# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 41aad Fadhiyadii 6aad, 7aad iyo 8aad

**Sabti, Axad iyo Isniin 20, 21, 22, Octoper 2019**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda xog-ogaal u-noqoshada Xaalada Dalka.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **(4min 01sec):-** Mudanayaal Wadanka ilaahay waa wanaajiyey oo waa iska nimcaysan yahay , meelkasta oo Wadanka waxa laga soo sheegayaa inay Barwaaqo tahay, hadii aynu u soo noqono Qaranimada Soomaliland waxaad moodaa in wax weyni ka si yihiin Siyaasada Gudaha iyo ta Debadaba oo la doonayo in wax laga qabto,Siyaasada Debadana waan aragnaa weli wax ka soo kordheyna ,Muqdisho ayaaba imika loo yaacayaa .Rag halkan Wasiiro ka waayey oo halkaas u yaacaya ayaa jira oo wixii Qaranimada loo soo marey iska ilowsan,Shaqo laga eryey ayey u yaacayaan, wixii Gudaha ah ayaa saameyn wayn ka muuqataa ,saameyntaa waxaan u xilsaarey, waa dad afarmilyan ah ,afartii milyana intaan sidooraney oo si wanaagsan isku dooraney Xukuumad ayaan sameysaney, hadaba waxaad moodaa in Xukumadani si weyn u humbuleysan tahay oo cadaaladii dhimatey

Hadaba ninkaad dooraney ee aad xukunka u dhiibatey waxaa la qaatey in Cadaalad wax ku wado,meelo badan oo laga soo doortey waxaa jira qawad badan ,Gobolkaad aragtaaba wax uu ka hadlayaa Cadaalad ma jirto,umadani waxaa u dooratey muuse Biixi inuu gadhwadeen u yahay oo Mujaahid weyn ahaa Dalkana cidi ka aqoonin sida uu yahay, Maantan waa Madexweyne maansha alla. Hadaba waxaan madaxweynaha ugu baaqayaa inkastuu shaqsi ka yahay, in xukuumadu sugto cadaalada, Madaxweyne afar Milyan ayaad xukuntaa ee waa in Cadaalada dib u eegto

**Marwo. Baar Siciid Faarah** **(8min 33sec):-** Waxaan salaamayaa Shirgudoonka Xildhibaanada iyo Marti sharfka , bacda salaam waxaan ku raacsanahay Xildhibaan xuseen Barwaaqadaas uu kaga waramey wadanka waana runtii, laakiin markaan soo qaato xaga Bariga Barwaaqo wax u dheer Nabadgelyo xumo ,Dadka Mudadaas Dagaalamayey oo weli la soo afjarin inkastoo imika aad moodo in Reerihii xaqiiqadii waajaheen oo Arinkoodii u guntadeen ,laakiin wax la tabayaa oo aan isleeyahay waa ka

dhiman yihiin kaalintii Dawladu aad ayey u jilicsan tahay.markaas waxaan odhan lahaa Arrinta Sanaag bal xaga Nabadgelyada xil ha la iska saaro

Sababtuna waxa weeye imika waxa la leeyahay Doorashooyinkii ayaa la qabanayaa ,waxaase la yaabanahay Doorashooyinka meesha lagu qabanayo ,waayo Dadkii meel wada Deganaa oo isdhex mareyn ,Dhulkii oo la moodo in uu ka sii baxayo Gacanta Somaliland , hadaba sida ay ku suurta galeyso anigu garan maayo, Anigu waxaan isleeyahay wax badan ayaa qabyo ah dhinac Nabad gelyada

Waxaan soo jeedinayaa Gudoomiye hadii laga doodo xaalada Wadanka lama arko waxa feedback ,Gudoomiye Goboladaasi wax ay ku yaaliin meelo kala fogfog, sida Sool Sanaag iyo inta u dhaxeysa Burco iyo Ceerigaabo,Goboladaasi madaaradoodu way xidhan yihiin, Hargaysa oo keliya ayaa madaarkeedu shaqeeyaa ,Madaaradii konton sano iyo lixdan sano ka hor shaqeynayey waa xidhan yihiin Dadkaas Goboladaas ku noola waxaa haysata dhibaato badan waayo Qof ayaa xanuunsanaya ama kooma galaaya ,isgagoo kooma ku jira ayaa Gaadhi la soo saaraa dabadeena dhexda ayuu ku soo dhintaa, takale Qofbaa Gobalkiisii degdeg ugu baahan inuu u tago mana helaayo wax diyaaraduu raaco

Hadaba waxaan soo jeedinayaa Madaaradaas xidhnaantoodu ma fiicnee ha loo yeedho cida ay kusayso,waxa kaloo maalmahan qaylo dhaan ka taagan tahay sida aad wada ogtihiin waxbarashada gaarka loo leeyahay ,waxbarashada gaarka loo leeyahay oo Dawladii ka reebtey waxbarshada bilaashka ahayd ,habeen dhoweyd waxaan arkayey nin ka hadlaya Dugsiyada dawlada oo leh Dadka taajiriinta ah ayaa dhigta ,Jaamacada Dawladan masaakiinta,maaha arintu caynkaas anigu sidaas uma haysto Dugsiyada gaarka loo leeyahay waxa la geeyaayaa dadka danyarta ah ee aan waxba baran Karin ,jaamacada la yidhaahdo Golilis sideed ardey ayaan geeyey anigu oo midna lacag lagama qaadin mid walibana reer danyar ah ayuu ka soo jeedey ama agoon ayuu ahaa , aad ayaan ugu mahadnaqayaa Jaamacadaas Golis , hadaba ma wax la odhan karaa jaamacada golis waxaa ka soo baxa ardey tijaar ah Markaas waxbarashada gaarka loo leeyahay aad ayey u caawisaa Bulshada , Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa wasiirka waxbarashad ha loo yeedho ,sida kale caafimaadka dadka danyarta ah dhibaato badan ayaa ka haysata ,cusbataala wayni waxa uu noo jiraa labaatan talaabo,qofka danyata ah marka la keeno ma helo serves uu u baahan yahay ,dhibaato badan baa ka haysata dadka danyarta ah dhinaca Caafimaadka ,Cusbitaalkeenu wax uu leeyahay Miisaaniyad aynu wada garanayno, Hay,aduhuna way Caawiyaan, hadaba Dawooyinka lagu caawiyo xagee la geeyaa? ilaan bukaanka cidi ma siiso ,yaase la siiyaa dawooyinkaa? ,hadaba waxaan soo jeedinayaa wasiirka iyo agaasimaha ha loo yeedho si loo waraysto,dhibaatada haysta dadka danyarta ah ee bukaanka ah,ugu danbeyn xaga

doorashooyinka xukuumadu garoon fiican ha u xaadho, si doorasho fiican nuugu dhacdo.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(10min 02sec):-** Shirgudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxafadda waan Salaamaya waxa aan ku salamaya Salaanta islamka Asalamu Calaykum. Inta kadib waxa aan doonaya in aan ka hadlo Dhawr Qodob:-

**Shilalka Gadiidka:-** Maalin walba ay dad badan ayaa ku dhintaan taas oo ay keentay **Gaadiid xumo:** baabuurta wadada marayo oo aan ahayn baabuur wadadda ku hagaagsanayn in ay wadad maraan marka waxa ay caalamku leeyihiin (MOT) wasaaradda gadiidka oo u dirta gaadiidka geerash si loo hagaajiyo loona hubiyo Gadiidka, maalin dhawayd wax aan soo maray gaadhi wadada ku xumaday oo ruquntu u baxday isla markana Candhada dhulka ku dhuftay oo wadadda Xidhay, sida aynu ogsonahay Xeerki Gadiidku wuu yaala dawladu waa in aysoo gudbisa, waxa kale oo jira insurance oo u ka mid yahay badbaadada gadhiga oo hadanu badqabin gadhigu aan la siin warqada.

**Wado Xuma:-**wadooyinkii oo xun oo googo'aan.

**Darawal xumo:** Darawaaladi oo aan lahayn liisanka wadista gaadidka.Waxa aan soo Jedinayaa in wasaraddu soo gudbisa sharciga insurance-ga gaadiidka, baaburka aan lahayna aanu wadada mari karin, waxa kale oo jirta in gadiidku sidii ay doonan ay wadada u isticmaalan.

**Sixir Baraarka**: Mudooyink ugu danbeyay ee intii uu yimi Gudoomiyaha Baanku Sarifkii Dollarku hoos bu u dhacay waxa kale oo jirta in wasaaradda Maaliyaddu cashuurihi kordhisay, cashuuraha la kordiyay hadi ay Dawladu is leedahay ka samaysaa Lacag Cusub waa khalad, haddi cashuurta la kordhiyo sixir baraar ayaa abuurmayaa,Ganacsataduna shacabka ayay ku kordhinaysa taasina waxay keenaysa in Wixii la Cuni laha ay qaali garooban, taasina waxa ay keenaysa Sixir baraar, Dekedana waa laga guuraya oo waxa loo guuraya Boosaaso,taasina waa khalad hadii ay dawladu doonayso,Marka waa khalad cashuurta la kordhiyay waa in sidii hore lagu celiya.

**Arinta Qunsulka Turkiga:-** arintii Xildhibaanka waa laga xaal mariyay oo waxa lagu yidhi haddi aad Xildhibaanada tihiin wax la idin furay Albaab gooni ah,Arintaasi ma aha in ay inaga inagu koobnato Shacabkeeni mee dadkii wax aay taagan yihiin bacadka oo an marna albaabka laga furayn Xata.

**Arinta Ceel-afweyn:** arinta ceel-afweyn way fududaha in wax laga qabto haddi dawladu cida dhib keenta gacanta ku qabto.

**Md. Abubakar Cabdiraxmaan Good** **(4min 49sec):-** Marka hore waad Salaaman tihiin dhamaan Shirgudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha iyo Saxaafadda.
Xaalada dalka waxba inaga qarsoona lakiin wax kasto la yidhaba waxa mushkilad waxba ka so fula Golaha wixi ka soo baxa in ay Xukumadu wax ka qaban waydo, waad og tihiin Xaalada beriga oo intaaso dhan dhib ka socotay oo aan ilaa hada waxba laga qaban, ayaa hadana Xukumadu dab ka hurinaysa Galbeedka dhibka Shacabkana aad mooda in Xukumadu dhagaha ka furaysanayso.

Abaar ba ka dhacday Galbeedka dad badan ba ku dhintay Xoolohoodina ku dhamaaden oo ku caydhoobay, Markasa Toban tigniko ah la dul keenay oo la leyahay dad aan hub sidan beerahanu idinka baabinayna, dadkiba laysku diraya oo dagaal lagadhex abuurayaa garan maayo Waxa ay Xukumadu uga dan leedahay. Waxa aan leeyahay Shacabkaas ma jirto Xukumad aad isku halaysane idinku isku tago isku tashadaa, waxa kale oo aan leeyahay Madaxweyne dadka raygooda dhagayso oo dadkan dhimaanaya wax ka qabo.

**Md. Maxamuud Jaamac Warfaa** **(5min 44sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, guud ahaan hadii aynu ka hadalno xaalada dalka, alxamdulilaahu dalka nimcaa inoo da'day waana in aynu ku shukri naqnaa nimcadaa uu alle ina siiyay 'ALLE WAXA UU YIDHI HADII AAD II MAHAD NAQDAAN WAAN IDIIN SIYAADIYANAA'.

Arrimaha amniga waxaynu ogayn xagaa barriga in ay colaado ka jiraan hada se waxay taagantahay gabo-gabo oo waxaad ogaydeen in labadii reer ee ay colaadu dhex tiil iyo Madaxweynuhuba ay is arkeen oo ay insha allaah inaga soo dhamaan doonto sida ugu dhakhsaha badan.

Arrinta waqooyiga ee Awdal iyo Salal iyadana waxaa loo saaray gudi wasiiro ah, waad ogaydeen oo markii ay dhacday duufaantii sagar in xaalada dhulku ay iswada badashay, oo meel buur ahayd ay noqotay banaan oo meel banaan ahaydna ay noqotahay buur markaa waxaa yimid in dhulkii uu muran ka yimaado oo la isku qab-qabsado, dawladu gurmad ayay ka gashay oo ciidamo amniga suga ayay u dirtay, hadana waxaa loo diray gudi wasiiro ah oo 6 (lix qof ) ka kooban waxaanan rajaynayaa in ay soo gabo-gaboobi doonto.

Qodobka 3aad ee aan ka hadlayaa waa arrimaha Doorashooyinka sida aan ka wada warqabno mudooyinkii ugu danbeeyay dalku waxaa uu ku jiray muran doorasho iyada oo ay marba cidi masuuliyadeeda lahayd oo doorkii hore waxaa eedeeda lahayd cidii tidhi komishanka la shaqayn mayno ee soo gaadhsiisay in la kordhiyo, inay jiitanto sidoo kale soo gaadh siisay xaalada ay maanta marayso.

Maantana tii oo kale ayaa taagan oo waxaa muuqata in uu murankii maanta halkii uu ka bilaabmay oo ay bilaabaan cidii markii hore murankaa waday oo ay yidhaahdaan waanu la noqonay xubintayadii, balaayo aflagama dhawree cidaasina waa xisbiga Waddani.

Arrimaha bulshada hadii aan ka hadlo mashaariic fiican ayaa inoo socota, dalkuna xaalad fiican ayuu ku jiraa hadii ay caafimaad tahay hadii ay waxbarasho tahay intaa iyo in ka badanba dawladu wey ku talo jiraa aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas)** **(7min 02sec):-** Shirgudoonka, mudanayaasha, saxaafada iyo marti sharaftaba waan salaamayaa, baryahaa waan joojiyay hadalkii oo waxaan u joojiyay marka aad wax ka hadasho ka hadasho ee waxba laga qaban waayo waa halbacaad lagu lisay, hadii aanay xukuumadu xildhibaanada la soo doortay ayaynu nehee waa in ay wax ka qabataa waxyaabaha aynu ka hadlayno waayo waxaynu nahay dhadhaarkii sadexaad ee dawladnimo.

Hadii la doonayo in ay wax hagaagaan waan in wax wadalahaanshiyo jiraa oo cadaalad looga shaqeeyaa arimaga dhaqaalaha, waxbarashada iyo wax kasta oo horumar keenayaba sida aan dhaw jeer oo horana halkan ka sheegay hadana waan ku celinayaa ilaa ay xukuumadu wax ka qabanayso waanu wadaynaa.

Miisaaniyada dalku waa ilaa 300 oo bilyan lacagta miisaaniyada deegaanka aan ka soo jeedo ee Barriga Sanaag hal mashruuc uguma jiro waananu waydiinay wasiiradii hore wax ay noo sheegeena ma jirto, xukuumaduna meelaha ay danaha ka leedahay ay wax gaysaa meelaha kalana waa la ilaaway oo Puntland ayaa la wareegtay oo deegaanada aan ka soo jeedo waa lala wareegay %80 , waxaasina wax la daawan karo maaha dadkeenuna way iska indho tirayaan laakiin wax la daawan karo maaha, halka ay xuukuumaduna iska indho tirayso ee ay leedahay waxba kama jiraan.

Sidoo kale waxaa jirtay lacag la yidhaa 2% oo lixboqol oo kun oo doolar ah oo aan la garanayn meel ay marto 'malaha fooqyada ayay ku dhistaane' waayo waxba nagama soo gaadhaan, maalin dhaweyd ayaa la geeyay wax yar oo faro ku tiris ah oo aan deegaankana wada gaadhay arinkaasi waa wax laga xishoodo, waayo hadii la yidhaa waar lixdaa milyan ugu deeqa oo ha soo gaadhaan gobolada intooda kale, waa mid aan dhacay waana waxyaaba inta badan aanu ka hadalo.

Sidaa awgeed deeganada aan ka soo jeedo waa mid laga indho qarsanayo maalin dhawna way wada gu'idoonaan sida muuqata waa in wax laga qabtaa waanad mahadsantihiin.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** **(3min 5sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka xildhibaanada iyo inta kale ee golaha joogtaba waan salaamayaa, waxaan ka bilaabayaa arrimaha bulshada, waxan ku bilaabayaa arrin time pump ah oo aad moodo in uu ina

sudhanyahay ayaan ku bilaabayaa oo ah shaqo siinta ama in shaqo la helo, waad wada ogtihiin bishii September inta jaamacadaha ka soo qalin jabisay oo 100,000 (boqol kun) in ku dhaw ayaa soo qalin jabiyay, waxaad ku dartaa inta dugsiyada sare ka baxday ee aan jaamacadaba aan galin iyo inta aan dugsiyana galin ee gaadhay dadii shaqada, ma ahan wax aan ka soo dheegtay daraasad rasmi ah laakiin markaan isku guur-guuriyay waxaan qiyaasay in 20 kun oo qof oo gaadhay xiligii shaqada ayaa albaabka inoo taagan waanad qiyaasi ka raysaan sayladeena shaqadu inta qof ee ay hada qaadi karto.

Dadka qaar ayaa aaminsan in ay kafayn karto dadkaas oo dhan xukuumadu, aduunyadana ma jiro meel ay xukuumadi ay tahay source-ka kaliya ee shaqo bixinta, Source-ka kaliya ee shaqo bixintu waa private sector-ka kaliya xukuumadu waxay leedahay hagista (guidance) cid waxaas oo dhan la samayn lahay lana eegi lahayd waa inaga. Qodobkaa waxaan isku dultaagay in shirgudoonku aan idhaahdo arrintaasi waa arrin taagan ee waa in aynu u samaynaa sidii loo gali lahaa hadii ay noqoto Gudidda Arrimaha Bulshada iyo cidii kale ee is xilqaamaysaba.

Waxaan maalmahan aan arkaayay wasaaradda arrimaha bulshada oo gobolada wareegaysa eegaysana qaabka loo shaqaalaysiin karo dadka oo iskugu yeedhaysay dhamaan daneeyayaasha waana arrin wanaagsan oo aan ku amaanayo wasiirka iyo wasaaradaba, waxaanan shirgudoonka ka codsanayaa in wixii warbixin ah aynu wadaagno.

**Arrinta waxbarashada:-** rag badan ayaa ka hadlay dibna ugu noqon maayo.

**Nabad galyada:-** waa wax taagan oo u baahan in hareeraha laga wada galo, bari iyo Galbeedba hada wey ka taagantahay, anigu ra'yigayga waxaan qabaa in ay xukuumada hal waajib uu saaran yahay oo ah Security, nabad-galyada iyo Amnigu wey kala duwanyihiin oo tusaale ahaan Ceel-afweyn hadii aan ciidan intaa leegi aanu dul fadhiyin sidan may ahaateen.

Xukuumada waan ku hambalyaynayaa kaalinta ay ka qaadatay, qodobka maqani waxaa uu yahay mana aha in aynu ku galgalano waajibaadka ee midi waa shacabka degan deegaanka oo qof ku leh midi ayaan ismarinayaa oo aanaa is dhaawacaya intaan la galgalan karno waa lala galgalan karaa, lakiin hadii dadkaasi aragtida aynu wadno ee aynu la jecelahay ee ah nabadgalyada inala qaataan waa qodob.

Golayaasha laftooda way u banaantahay mana aha in ay yidhaahdaan xukuumadii ayaa noo yeedhi weyday ee waa in aynu kala shaqaynaa xukuumada iyo dadweynahaba, xukuumadana waxaan ku hambalyaynayaa kaalinta amniga iyo dhaqdhaqaaqa ay

samaysay golayaasha iyo shacabkana waxaan ka codsanayaa in la garab galo, lakiin hadi uu qof ku hore iyo daba diid yahay cidina uma taag hesho.

Hadii aad eegtaan sidan ay hada xaaladu u socoto ee Tv-yada looga hadlo ee hadalada xanafta leh loo sheekaynayo ee hashawna lagu soo koobayo xukuumada ayaan shaqaynayn iyaga oo dadkaasi ah kuwii waxan oo dhan duminayay, sidaana xukuumada laguma wada shaqayn karo, ee waxaa lagu wada shaqayn karaa iyada oo iyaduna inoo abuurantahay inaan wada shaqayno.

Dhaqaalaha:- waa laga yaabaa adigu markaad halkaa ka eegto qofka aan dhaqaalaha aan aad u aqooni in uu moodayo in uu maanta uu dhaqaaluhu ugu liito, laakiin inta aqoon u leh dhaqaalaha iyo lacagta waxay fahmayaa in ay hada bilaabantay soo kabashadii, waxaanad moodaa marka ay bilaabanto soo kabashadu in ay wax walba istaagaan.

Saddex Sababood ayaan idin Tusuyaa:-

- System-ka ay wasaarada maaliyadu hada samaysay ee daah furnaanta ah ee cid waliba ay la soconayso dhaqdhaqaaqa iyo halka ay wax marayaan waa astaan rasmi ah oo muu jinaysa in uu dalkaa soo caafimaadayo dhaqaalihiisu.
- Qaabka loo bixiyo lacagaha oo ay ugu muhiimsantahay Qandaraasyada, 300 oo qandaraas oo dhanka horumarinta ah ayaa si daah furan loo shaaciyay oo xataa dadkii laga helay ay goob joog ahaayeen waana markii ugu horaysay ee xukuumadani samaysay.
- Sixirbararaka mudo hada laba sano ku dhaw hal meel ayuu taaganyahay, waxaana laga eegaa index-kaa ku saabsan sixir bararka in ay soo kabasho ay jiro, lakiin hadii uu nin walba ka qiyaaso inta maalintii jeebkiisa soo gasha oo haday waxba soo gali waydo uu yidhaa dhaqaalihiii wuu burburay taasi waxba lagu ma qiimeeyo.

**Arrimaha doorashooyinka: -** mudane gudoomiye waxaan ka afeefanayaa xildhibaano iga horeeyay ayaa waxay eeda saareen xukuumada oo yidhi “kama muuqato firfircoonidii xukuumadu arrimaha Doorashooyinka” sidaa awgeed xaq iyo waajib ayay nagu tahay in aanu kalmad ka nidhaahno.

Arrimaha doorashooyinku waa arrimaha ugu muhiimsan ee dalka maanta yaala oo sida aydun ka wada war qabtaan waxaynu u taaganahay 13-dec in ay doorashadii golaha wakiiladu in ay sideedii u dhacayso.

Sidoo kale waxaa muuqata in ayna doorasho sideedii u dhacay, markaa halka laga leeyahay xukuumadu uma dadaalin anigu ra’yigaa ma qabo, waxaan qabaa ra’yi kaa warfaa la mid ah ayaan qabaa, mudo sanad ah waxaan u taagnayn arrintii ku saabsanayd

komishanka oo noqotay sababtii dib loogu dhigay doorashada, arrintaa diidmadeedana xukuumadu may lahayn waana la wada garanayaa cida diiday.

Xukuumada Saddex wax ayaa laga sugayay waxaanand wada daawateen iyada oo ay xukuumadu lacagtii doorashada ku wareejisay gudidda doorashooyinka, waxaa laga sugayay in ay asxaabta isku keento intii ay shir u qabatayna waan wada ognahay, ta sadexaad waxaa laga sugayay in xeerkii soo gudbiso Iyana way soo gudbisay wuuna ina hor yaalaa oo waxa uu u yaalaa arrimo in si heer qaran ah loo galo u baahan.

Sidaa awgeed anigu waxaan qabaa xukuumada uu madaxweyne u yahay Md. Muuse Bixii Cabdi in ay fulisay wixii looga baahnaa, inaga iyo xisbiyada waxaan kula dardaarmayaa in hada wixii ka danbeeya aynu dadaalkeeda galno taas halkaa ayaan kaga baxay.

**Arrimaha Dibada: -** in badan waa laga hadlay arrimaha dibada laakiin waxaan is idhi dadkan ka hadlaya arrimaha dibada waxaa ka maqan arrimaha dibadu Maxay qabataa? Arimaha dibadu Structure-na kama shaqayso dhismayaalna ka ma shaqayso ee waxay ka shaqaysaa xidhiidh ay la yeelato wadamo dibada ah, halka waxaa iigu qoran sanadkan oo kaliya in 23ergo oo arrimaha dibada ah kulana heer ah oo ta ugu saraysa uu madaxweynuhu yahay oo waad ogaydeen sidii loo qaabilay markii uu tagay GINI iyo meelihii kale ee u tagay dhamaantoodba, ayna ugu hoosayso agaasimayaan ka tirsan wasaaradda arrimaha gudaha 27ergo oo diblomaasiyadeed oo dibada ah ayaa la diray, 9wasiir oo kala duwan oo aan ahayn kuwan arrimaha doorashooyinka ayaa wadanka yimi, markaa anigu garan maayo waxa kale aya qaban lahayd ee laga sugayay waanan ka baxay mudane Gudoomye.

**Md. Cali Maxamed Aden (Cali Bare) Point of correction**:-mudane Gudoomiye marka aynu ka hadlayno arrimaha dalka looma baahna wagar iyo maansha allaah ee waxaa loo baahanyahay waa in xaalada si dhab ah looga hadlo oo meelaha ay dhibaatooyinku ka jiraan, dhaqaalaha, maamulka, arrimaha bulshada sidii xal dhab ah loogu heli lahaa oo wixii macluumaad inaga dhiman ayaa loo baahan yahay laakiin sidani waxba soo kordhinmayso waana inagu sharaf dhac ee inaga joojiya dooda noocan ah.

**Gudoomye Baashe**. Doodoo maanta halkaa ayaan ku joojinaynaa, xildhibaanadana waxaan ka codsanayaa in ay soo qodabeeyaaan doodooda fadhiguna wuu xidhan yahay.

**Md. Maxamuud Ismaaciil Bade** **(7min 44sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xildhibaanada, saxaafada, iyo marti sharaftaba waan salaamayaa run ahaantii doodadni waa maalintii 3aad ee ay socoto, muhiimadeeda ayayna leedahay.

**Nabadgalyada:-** nabadgalyadu waa laf-dhabarta qarankani ku dhisanyahay la'aanteedna waxba ma jirayaan run ahaantii kharash badanina wuu inagaga baxaa oo waad kawada warhaysaan inta miisaaniyada inaga baxdaa, markaa hadii aanu qarankan iyo dhamaanteen ayanaan isku duubnaan ma dhis mayso.

Waxyaaba nabadgalyada dhaawici kara ee aan arkya waxaa ka mid ah mushkilada dhulka, dhulku waxa uu ahaan jiray dhul ilaahay hada se Somaliland oo dhan dad ayaa iska leh waana lawada haystaa oo hadii aad iskarago buur dhagaxaan u doonto qori ayaa lagala soo degayaa waayo waxaa la waayi doonaa iskarago dhagax inoo doonta waayo macaash ayaa laga helay, waxaa kale oo jirta dad inta is kooxaystaan oodanaya dhulkii seerayaasha ahaa ee xolooluhu ay daaqayeen, sidoo kale waxaa Iyana dhibaato wayn ku haysa dhuxusha oo la iska shidayo, dhanka kale waxaa ka mid ah xukuumadihii kala danbeeyay oo degmooyin miidhan abuuray oo aan xad kala lahay deedna la isku qabsanayo.

Shilalka gawaadhida oo dhimashadoodu ka tiro badatay dagaaladii fool ka foolka ahaa, iyada oo sanad walba warbixin la soo saaro lana yidhaa intaas ayaa dhaawanacatay iyo intaas ayaa dhimatay lamana odhan sidee looga hortagayaa marka laga yimaado wado xumada iyo Qadarka ilaahay inagu maxaynu ku talo galay midna ma jirto.

Sidoo kale waxaa nabad galyada khatar ku keeni karra dhaqamada xun xun ee ina soo galay oo ay ka mid yihiin waxa la yidhaa maandooriyayaasha ay ka midka yihiin xashiishada, Daroogagada iyo khamriga oo la leeyahay ubuxii soo kacayay ayaa cabaya ama dubanaya, markaa waxaa abuurmaya khaatiliin. Waxaa kale oo xildhibaan ka dhawaajiyay in dalka lagu faafiyo diinta kiristaanka oo uu diiday dastuurkeena qodobkiisa 5aad farqadiisa 1aad uu si cad u diiday waana arrin ay masuuliyadi inaga saarantahay dhamaanteen.

**Arimaha Bulshada:-** systemkan aynu qaadanay oo ah decentralization ku sidiisii ma u hirgalay mise uma hir galin? waa su'aal taagan hadii aad tidhaa wuu hirgalay, imika hadii aan magaalada Hargeisa saxmada baabuurta waxaa ka badan ta dadka, markaa hadii ay adeegyadii dhaadheceen maxaa dadka isugu keenay halkan, oo jaamacadii, iskuuladii iyo dhakhaatiirtii halkan keenay, waxaa keenay adeegyadu sidii larabay gobolada uma gaadhin, tusaale ahaan waatii dhawaan laga hadlaayay deeqaha wax barasho ee dibada waxaa lagu saleeyay tirade dugsiyada labadan gobol ayaa ugu batay dalka intii kale maxaa ku dhacay? Ilaa 1991-kii ayaa halkan iskuulo laga dhisayay weeye micneheedu.

Arrinta waxbarashada dadban waxay tahay wasaaraddu in ay siyaasa hagto oo qiimayn samayso, laakiin maaha in la yidhaa waxbarashada dad bani deeqaha waxbarasho waxba

kuma leh waa arrin khaldan oo dadkani miyaanay muwadiniin ahayn, haa waan qabaa 70% lasiiyo ku dawliga ah 30%-ka waa in la siiyaa iyaga.

Mana aha in ay cadaadis saaraan iskuulada gaarka loo leeyay ee waa in ay ka shaqeeyaan sidii ay u tayayn lahaayeen iskuulada dawlada hadii ay noqoto dhinaca macalinka iyo iskuulkaba waayo nimankaasi bulsho aad u tiro badan ayay hayaan tixgalintoodana way leeyihiin, dhanka macalimiinta ka Ceerigaabo jooga, ka burco jooga iyo ka Hargeisa jooga ee aan joogtada ahay farqi weyn ayaa u dhexeeya oo ka Hargeisa joogaa waxaa laga yaabaa in uu dhawr iskuul uu dhigo ka ceerigaabo joogaana cidluu taaganyahay ee waa in mudnaanta kaa la siiyaa, waxaanan la qabaa nimankii xusay in macalimiinta iyo askarta mudnaanta la siiyo.

**Caafimaadka:-** sidoo kale ma dhaadhacsana oo dadkii burco cisbitaalka Hargeisa ayay dhamaantood joogaan waayo survice ka ay ka helayaan kan hargeisaad kama helayaan ka burco waana sababta keentay inay cisbitaalada hargeisaad buuxsamaan. Inkastoo hada qolalka gaarka ah ee cisbitaalka burco dhamaad ku dhawyahay waanan ku hanbalyaynayaa xukuumada, lakiin cisbitaalkaa dhami malaha Anbalas, malaha ICU waana cisbitaal weyn, mishiinka kalyaha kab ku filan lama siiyo, waxaan qabaa in aanu awoodin inuu kafeeyo dadka gobolkaa, markaa waxaan xildhibaanada ka codsanayaa in ay isha ku hayaan miisaaniyada soo socota.

Dalkan waxaa isugu yimi dhakhaatiir ajaaniba oo u soo shaqo tahay wadanka cid allaale cid aqoontoodaa baadhay oo cadaysay ma jirto iyaga oo qaliinada dhamaantood gala, dawooyinka waxaa loo iibiyaa sidii raashinka oo kale, dadkeenan lama barin in daawooyinka lagu iibsado waraaq uu dhakhtar qoray oo kaliya. Maciishaduna waa la mid.

**Beeraha:-**tan iyo 1991-kii wali maan arag wasaarada beeraha oo mashaariic ka wada bariga, xataa qalabna ha noqotee waayo dhulkaasi waxa uu leeyahay biyo dadkiisuna waa u diyaar in wax beertaan ee waa in arintaana isha lagu hayaa.

**Doorashoyinka:,** waa hal xidhaale Somaliland u yaala, laakiin inaga waxa inaga beegani waa sharciga ee yaan la ina odhan iyaga ayuu u xayiranyahay xeerkii doorashooyinku, furida dastuurkana anigu waantaageersanahay wax ku jabana garan maayo hadii qodob ama laba la furo waxna lagu saxo, arrintaa doorashaduna waa arrin u baahan tallo qaran, waana in aanay noqon mid wax galaafata ama dhib keenta.

Ugu danbayntii waxaan shir gudoonka ka codsanayaa in doodan oo ah markii 3aad in la ururiyo waxna ka soo baxaan ilayn iska hadal uun maahee waa in macno leeyeelaa oo meelaha ay khusayso waa in la gaadhsiiyaa iyada oo talooyin, go'aamaba isugu jirta oo inta la daabaco loona qaybiyo Golahana.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable)** **(5min 10sec):-** bismilaahi Raxmaani Raxiim, anigaa hadhay looma hadlo, wax hadal ah oo hadhayna ma jiro wakhtiguna waa gabaabsi, markaa Saddex qodob oo aanay ragii hore ka hadal ayaan ka hadlayaa

**Nabadgalyada:,** sida aan wada ogsoonahay nabadgalyadu waa inoo wada faa'iido shicib iyo dawladba lamana helo aqoonsi, dhaqaale iyo magac hadii aanad nabad galyo haysanin cida nabad galyada laga rabaa waa shacabka inta aan dawlada laga rabin cida kale ee soo raacdaa waa axsaabta, waxaan halkan ugu baaqayaa maanta axsaabta oo maanta aan ahayn axsaab ee fidno ka shaqaysa, waxaanay ku koobantahay reerkaa dhexda ku jira Somaliland.

Saddex Reer ayay saxaabteenu maanta ka koobantahay taasina waa dulmi meeye dadkii wadanka inala lahaa ma inaga ayuun baa isku baddelayna waxaan soomaaliland u soo jeedinayaa in distoorka la furo si ay dadka kale ee wadanka inala lihi ay uga qayb qaataan waayo fidna kasta oo dhacda xisbi ayaa hoosta kaga jira oo uu isleeyahay ku giijidii jabhada oo kale.

Waxaad ogaataan xuquuqda, nabadgalyada cida ku ilaalinaysaa dawlada waa axsaabta, wali intaa Somaliland jirtay maan arag nin wasiir ah oo kaamil ah, markaa miyaanay dulmi ahayn inta aynu dawo ka hadlayno kii muwaadinka ahaa ayaan xuquuqdiisii wadankan aan ku haysan, markaa waa in qaladaadkii ina soo maray la saxaa oo dastuurka la furaa.

**Wax soo saarka:-** wax soo saarka iyo miisaaniyadiisu way wada socdaan ilaa hadana mahayno miisaaniyad lagu caawiyo wax-soo-saarka, qaladaadka ay galayso guddideedna Dhaqaaluhu waa in ay ogaadaan waxyaaba la inagu caawiyo ee dalalka dibadu inagu caawiyaan, tusaale ahaan wadanka la yidhaa Burkino Faso uu sameeyay ee uu yidhi waxyaaba lagu caawiyo wadanka waa in madaxtooyada xafiis looga sameeyaa si loola socda wixii caawimo la bixiyay, markaa la waydiiyay waxa uu uga dan leeyahayna waxaa uu sheegay anigaa baahidayda garanaya, markaa waxaan madaxweynaha u soo jeedinayaa in uu xafiis u sameeyo mucaawimooyinka ina soo gala oo aan gacta wasaaradaha loo galin si gobolada u baahan loogu qaybiyo.

Dawladii timaadaa waxay bixisaa dayntii dawladii ka horaysay ay gashay waana masiibooyinka ina haysta, waana in ka Gole ahaan aan ogaano wixii dayn laga tagay iyo cidii qaadatayba, waayo aqalo ayaa laga dhistaa wadamo shisheeye waar taasi miyaanay xaaraan ahayn waa in la xisaabiyaa cidii wadankan dhacday, iyaga oo hadana u soo tartamaya asxaabta oo doonaya in ay qabsadaan oo mdaxweynayaal noqdaan waa halkii uu islaamku gacanta goyn jiray.

Dhaqaalaha:- 28-ka malyuun ee qaadka inaga baxa 28-sano waxaynu kari weynay in ay xeertaa inta aynu qabano aynu milix ku badalano oo 70dobaatankaa ethiopianka aan ka iibino, baabuur 70kun oo doolar ahna waynu wadanaa, markaa waa in la keenaa fikir anu ku hagaajinayno dhaqaaleheena, wali intaa ay barwaaqadu jirtay maan maqal hal-dhaam oo la qoday.

Tusaale ahaan waxaan doonaynaa in aynu ku dayano ninkaa madaxweynaha ah ee Burkina Faso sida uu dhaqaalihii ugu sameeyay beera ee africada kale intee kale uu wax uga iibiyo ee aan bada lahayn, markaa waa in miisaaniyada la daadajiyaa, waana in la seemeeyaa siyaasad cad oo wadanka lagu hagayo, waana in la sameeyaa daraasado wax ku ool ah waxna lagu saxayo dhinacyadaa aan soo sheegay oo wada dhan WCS.

**Md. Maxamed Cumer Aaden (Jiir)** **(10min 5sec):-** Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi wabarakaatuhu, gudoomiye waxaan jeclahay in aan view points in aan yara taataabto aadna ugu dheeraan maayo kaliya waxaan bixinayaa tusaalayaal yar-yar, dhamaanteen waxaynu ka wada tirsanahay xisbiyo waxaana loo baahan yahay inta xisbiga dhexdiisa wixii laga wada hadlayo laga wada hadlo oo nin walba wixii ay u la muuqato uu wax ka yidhaahdo.

Qodobada aan wax ka odhanayo waxaa ka mid ah oo aan ku horaynayaa **Arrimaha Dibada,** waxaanad moodaa dad go'aamo inaga gaadhay oo aan qadiyadeena u baahnayn in ay dib ugu noqdaan ayaad moodaa in aynu saaxibadeen ka dhiganay, anigu halkaa waxaan odhan lahaa aan dhex galno umadahaa kala duwan ee caalamka ee kala afkaarta ah oo aynaan noqon niman cid kali ahi tirsato oo aynu cidii danteena inala qabata ama aan danteena ka dhex aragno aan xidhiidh la samayno, waxaan arkayaa qaar aynu isugu dhawnahay oo ayna qaarkood go'aanba qaadan garin, dunida waa la yaqaanaa oo laba saddex quwadood ayaa go'aan qaadan kara kuwiiina diyaar ma aha markaa dawladu waa in ay baadi goobtaa sidii ay ula macaamili lahayd mida quwadahaa sida inoola shayqaysa oo ay ka dhaadhicisaa in dhinaca kalana inoola shaqayso.

**Arrimaha Gudaha:-** waxaa ii muuqata in ay dawladu wax isku day-daydo oo ay mucaawimooyin ka gaysato hadii Garoomo la samaynayo, hadii Airport la samaynayo oo uu miisaanka umadu kala tagayo, hadii uu miisaanka umadu kala tagana nabad galyadu ma jirayso oo ay dadka qaar wax tabanayaa oo ay leeyihiin waxaas iyo waxaas ayaa naga maqan, waxaan ku talin lahaa marka ay dawladu wax cid u samaynaysa waa in marka hore daraasad la sameeyaa, malihi ma samayso laakiin wax ayaan qawadayaa aanan isleeyahay hadii cilmi baadhis dhamaystiran la samayn lahaa in cidwalba ay wax gaadhi lahaayeen, lakiin hada waxaad moodaa in hada qaybintoodu ay dhinac u badantahay tusaale ahaan bariga oo kale oo dhulka waynaantiisu uu xagaa jirro.

Tusaale ahaan waxaa jira ceelal dawladu ay meelaha qaar ka qodo laakiin way ku yaryihiin bariga, dadkaa bariguna waxay iskaga badanyihiin dad xoolo dhaqato ah si ay biyo yaraanta ugu baxaan waxay samaysteen barkado ay is yidhaahdeen biyo yaraanta kaga baxa, taas oo keenaytay dhibaato ay ka mid tahay dhir yaraan waayo barkadahaa waxa lagu oodaa waa dhirta oo sanadkiiba saddex goor lagu xayndaabo, waxaan soo jeedin lahaa in dawladu ceelal u samayso si dhibaatadaa looga maarmo.

Maadaarkii burco ee 10sanno ka hor la bilaabay waxaan is leeyahay waxaa maqan gacantii dawlada markaa waxaan leeyahay taasna dawladu hoos ha u eegto, sidoo kale waxaa jiri-jiray iskuuladii farasamada gacanta ee dawlada jarmalku sameeyeen oo aan ilaa hada wali shaqayn waxaan kaasna leeyahay waa in la soo celiyaa si tabashada dadku aad u yaraato waxaan ku talin lahaa in la soo celiyo aniga oo agsoon dhibaatooyinka badan ee dawladda haysta, waxaa kale oo aan soo  jeedin lahaa in iyagana la sameeyo training schools oo qofku hadii uu in badan wax soo baranayay oo aan training la sii wey adkaanaysaa siduu wax u abuurtaa.

Waxaa kale oo aan ku talin lahaa sid dadka reer baadiyaha ah dowladdu u samayso iskuulad ubadkooda lagu xereeyo oo ay wax ku bartaan, sidoo kale macalimiinta iyo dhakhaatiirta waxaynu u baahanay dad waxan aqoon u leh oo inoo tababara dadkii ku shaqaynlahaa qalabkaa dhakhaatiirta inoo yaala, waana in la siiyee macalimiintaa iyo dhakhaatiirtaa short cources yearly ah si uu development ay u gaadhaan.

**Arimaha nabadgalyada:-**waxaan odhan lahaa waxyaabo badan ayay secrat la'aantu dhalisaa, in kasto oo aanad ciidan keena xaaladiisa odhanayn waa sidaa oo aanan aqoon u lahayn, waxaan odhan lahaa ciidan dhibaato u gaysan karo kuwaa, oo ay ogaadaan hadii ay dhibaato inoola yimaadaan aan iska dhicin karno, tan maanta socotaana waa maaweelo oo wax ayaa la urursanayaa waana tii waligeed la inagu waday, ee waxaan soo jeedin lahaa waa in la isla daayaa wada hadalkooda oo aynu ciidankeena dhisanayaa.

Ugu danbayntii waxaad moodaa in ay noloshii aad iyo aad ay u sarayso waxyaabaha sababna ay ka mid tahay sida qaadka oo kale oo aynaan waxba ka qaaban karin, kuwa kale ee wax laga qaban karo wax laga qabto sida maciishada oo kale iyada oo aan culays saarayn kuwa jira waa in ay wax soo kordhiyaan iyada oo suuqa ku tartamayso oo dad badani qiimaha maciishada hoos ugu dhigaan, hadii kala wax iibsanaya iyo ka laga iibinayaa khatar ayay suuqa ku yihiin waanan ka baxay waad mahadsantihiin.

## Kal-fadhigii 41aad Fadhigii 7aad

**21, Octoper 2019**

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda xog-ogaal u-noqoshada Xaalada Dalka **Maalinta 2aad**

**Md. Cabdiraxamnaa Yususf Cartan** **(11min 24sec):-** Shir-guddoonka, Mudanayaasha, saxaafada iyo Xoghaynta waan salaamayaa. Waxay illa tahay haddii aynu ka hadlayno xaalada dalka in aynu si dhab ah uga hadalno.

Xildhibaano ayeynu nahay Golihii Wakiilada ayeynu nahay dad aynu calal aqal matalnaa, duruufuhuna way iska badan yihiin, ujeedada duruufaha loo sheegayaan maaha cidbaa lagu maagayaa ama cidbaa lagu xumaynayaa.

U jeedada aynu duruufta uga hadlaynaa waxa weeye in aynu wixii khalad ah isla eegno, dabeetana aynu ka fikirno wixii kahladkaa dhacaya ee duruufaha inagu gadaaman wax ka qabano. Wixii inaga ka Gole ahaan inaga aadan aynu wax ka qabano. Wixii xukumada ku aadan ee khalad ah aynu wax ka qabano, wixii dhinac dadweynaha iyo qabaa'ilka ahna aynu wax ka qabano oo aynu talo ka bixinso.

Markaa xaalada dalka si dhab ah oo aan kaftan ahayn aynu uga hadalnaa loo baahan yahay oo aan qof ku xumayn ahayn.

Xaqiiqatan Somaliland marxalad aad iyo aad u culus bay maraysaa dhab ahaan. Xaalada Somaliland runtii meel adag ayey maraysa. Waxa jirta marka aynu ka hadlayno xaalada Somaliland. Waxaynu eegaynaa waa hore halkay maraysay iyo halka ay maanta marayso.

Somaliland waxa ka tisqaaday nidaam dimuqaraadi ah. Caalamka wuxuu inagu qiimeeyey inuu nidaam yaable ahaa. Dal aan la aqoonsanayn oo aan dhaqaale dibada ka helayn oo dimuquraadiyada ku talaabsatay oo xisbiyo samaysatay oo doorashooyin qabatay oo ku guulaysatay oo ilaa maanta tartan adag gashay oo xigmad uga gudubtay. Amaan badan ayey inoo soo jiiday, waxa la yidhaahdaa. Waxa lagu magacaabay Somaliland (The best kept secret in Africa) sirtii ugu waynayd ee Africa aynu ku magacaabanahay.

Waxa la inagu magacaabay Tog barwaaqo ah oo ka jira dhul abaar ah oo micnaheedu yahay meel nabadi ka jirto, dalalka Geeska Africa oo ku caan baxay meel khilaafaad colaad iyo dhibaato ka jirto. Waa waxyaabaha magaceenu ku baxay dibada. Markii South Sudan qaadanaysay Madax banaanideeda, waxyaabaha caalamku kula taliyey waxa ka mid ahaa. "Waar South Sudanoow, dal yar oo la yidhaa Somaliland baa jirtee tagoo sirta ay ku guulaysteen ee ay nabada ku samaysteen oo dimuqaraadiyada ku sameeyeen soo eega".

Inaga waa la inagu casuumay oo waxa tagay madaxweynaheena iyo barlamaankeena, waxay inoo soo direen oo wafti u soo direen oo ay inna waydiiyeen waar niyahaw sideed waxan u samayseen oo nabada iyo dumuquraadiyada u samayseen. Caalamka waxaynu u ahayn dal lala dhacsan yahay in kasta oo doorashooyin isu dhaw ku kala baxay, guulo waaweyn ayey ahayd. Hay'adihii sameeyey inaga weeye awood ayeynu u leenahay in aynu sii wadno wixii ka xumaadayna ka hagaajino.

Haddaba maxaa dhacay? Waxaad moodaa guushii faraha badnayd iyo amaantii caalamku inagu siiyey inay fakatay oo ay hoos u dhacday, ciladaasi xagay ka timid,

ciladaasi waxay ka timid aragtidayda aniga hay'adihii dumuquraadiga ahaa ee dumuquraadiyada dhisay oo ay Barlaman tahay, Guurti iyo Wakiilaba oo ay Xisbiyo tahay ayaa habac galay, markaa Barlamanka oo ah Wakiilada iyo Guurtida ee dadka ma talayey uu habac galo, fir-fircoonidoodii iyo hal-abuurkoodii hoos ayey u dhacaysaa.

Haddii ay taasi dhacdo, kalsoonidii uu dadku inagu qabay way yaraanaysaa. Sida Guddoomiyuhu sheegayey waa in Xildhibaanadu Golaha yimaadaan oo ay ka soo qayb galaan, waana mid meesha ku jirta.

Arrinta muddo dhaafka markii hore guurtida ayeynu ku sheegi jirnay inagii ayaa imika soo gaadhnay inaynu wax ka qabano ayaa loo baahan yahay oo u halganaa sidii doorashooyinu u qabsoomi lahaayeen.

Waxa kale oo inaga daran waa asxaabtii. Asxaabtu wakiilo ayey ka yihiin dadka oo kuwii dadka tabashadooda ka hadli lahaa. Marka Xisbiyada Qaranku gabaan hawshooda ee u doodista Deegaanada iyo Gobolada waxa hadlaya oo bedelaya qabaa'il oo salaadiin ayaa hadlaysa oo odhanaya haddaanu nahay reer hebel, haddii aan waxaas iyo waxaas xukumadu qaban balaa dhacaysa ee sii hanjabaya.

Haddii Xisbi jiri lahaa Magacooda ku hadlaya oo baahidooda ka hadlaya may hadleen salaadiintu. Xisbiyada gaboobay ee kaalintoodii gabay marka Qabaa'ilka iyo salaadiintu cid u hadasha waayaan oo tabashadoodu dhab tahay, waxay noqonaysaa inay iyagu hadlaan.

Xukumada waxa lagu soo doortay qaab dumuquraadi ah, qaab dimuquraadi ah ayuunbaa lagu badeli karaa. Qabiil ma bedeli karo, oo jabhad hubaysani ma bedeli karto, oo reer cadhaysani ma bedeli karo. Sida lagu bedalayaa waxa weeye si dumuquraadi ah ayaa lagu soo doortay, si dumuquraadi ah ayuunbaa lagu bedeli karaa.

Hase yeeshee, haddii hay'adihii hawshaa qaban lahaa ay ka seexdeen ama hawlgab noqdeen oo xisbiyadu kaw ka yihiin oo xisbiyada qaar 30 jir yihiin oo 30 sanoo hal guddoomiye haysto waxa Allaale wuxuu kordhin karayaa ma jirto.

Markaa Somaliland hay'adihii dimuquraadiga ahaa hawshooda gudan waayaan, waxa qabsanaya oo hawshii la wareegaya qurbo jog xayraan ah oo qabyaalad la yaacaya iyo salaadiin iyo odayaal moodaya in qabyaalad wax lagu bedeli karo.

Hay'ada dimuquraadi ah hay'ad dimuquraadi ah ayaa bedeli karra waanay fududahay, cidii neceb xukumada ha soo marto jidka saxda ah oo ha joojiso jabhadaynta iyo qabyaalada oo way ka sii daraysaa haddii lagu wado oo xaafad xaafad ayey inoo saaraysaa oo jilib jilib, tuule tuule ayey inoo saaraysaa waynu ku baaba'aynaa.

Xalku wuxuu ku jiraa inaga oo ku shaqaynya nidaamkii dumuquraadiga ahaa ee aynu qaadanay, hadaynu nahay xildhibaano xilbaa inaga saaran hay'adahan gaboobay ee

muddo dhaafka eek an aynu fadhinaa kaw ka yahay, xisbiyada bakhtiga ah, ee Guddoomiyaashu 30 sanno ay joogaa. Waa in iyaga wax laga qabtaa weeye, haddii aynaa hawlaas wax ka qabanin wax dhacayaa ma jiro.

Haddii la waayo cid u hadasha dadka Somaliland oo xisbiyada iyo Golaha Wakiilada ah qabii'lka iyo dadka ayaa hadlaaya, haddii qabiil hadlana qabiil kale ayaa u jawaabayaa. Haddii ay sidaas noqoto waynu kala tagayaa. Wasaalu Calaykum Waraxmatulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(4 min 20 sec):-** Shir-guddoonka, Mudanayaasha sharafta leh, Saxaafada, Marti-sharafta dhammaan waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka. Asalaamu Calaykum Warax Mataulahi Wa Barakaatu.

Doodu maalmahanba way socotay in xaalada dalku meel adag marayo qof kastaa wuu ka dharagsan yahay, been hadaynu dadka u sheegnana waa dambi walahi. Inaga ayaa la inagala xisaabtamayaa, inaguna qayb ayeynu ka nahay in xaalada dalka aynu wax ka bedelno oo Madaxweynaha u tagno oo talo siino. Shir-guddoonka ayey ahayd inuu isku keen xidho, waana hogaanka isku keen haya.

Xeerka waxabarshada Guddi loo saaray ayaanu ahayn oo macalimiin ah, Guddi kooban oo 11 ka kooban ayaanu ahayn oo ku samaynay. 17 sanno ma arag xeer la isku haysto iyo xeer hoosaad iyo wax laga hadlaayo. Xeer waa kol haddii labada Gole ansixiyeen Madaxweynuhu saxeexay cid ka hadli kartaa ma jirto. Laakiin xeer-hoosaadiyo waxaas ayaan fahmi waayey. Xeerkaas in sidiisa loogu dhaqmo weeye.

Maanta waynu ka dharagsan nahay xaalada iskuulada dawladda. Macalimiintii fiicanayd way ka tageen, sababta ay uga tageena baahi ayaa keentay, baahidii keentayna waynu dabooli karnaa inaga ayaa Miisaaniyaddii gacanta ku ahayna in aynu wax u habayno waa muhiim.

Dhakhtarka weyn ee agteena ah dad masaakiin ah oon waxba haysan ayaa imanaya tusaale ahaan, qofkiina lacag ma sito markaa in aynu ka warhayno oo Guddidu eegto Maaliyaddu waa muhiim. Mushkiladuna waxay ahayd in xaalada dalka marka aynu ka hadlayno in fasaxa aynu tagno Gobolada dalka. Mar alle marka fasax la galo Guddiyada waa la diri jiray oo waxa loo diri jiray Gobolada, lacagtoodana waxay kala bixi jireen Miisaaniyada Gobolada wayna ku darsan jireen, waayo inagii ayaa miisaaniyadii gacanta ku hayna, hadana mar walba cid daba joogna. Taasina wax loo dulqaadan karo maaha.

Maadaama aynu gacanta ku hayno Miisaniyada waa in aynu wax ku darsanaa oo xaalada dalka u kuurgalnaa. Maalinba cidbaa joogta, maalinba Madaxweyne ayaa jooga. Markaa in la wada shaqeeyo oo saddex dhardhaar ayeynu nahee wada shaqayno waa muhiim. Xaga caafimaadka waa nolosha koowaad, kolay inaynu wax go'aamino waa muhiim oo wax ka jari karno waxna ku darri karno waa mihiim Qodobka 53 ee dastuurka ayaa ina

siinaya, waa in aynu wasaarada eegnaa oo waxna ku kordhin karnaa waxna ka jari karnaa. Waa in Wasaarada wax soosaarka leh sida Beeraha iyo Wasaarada Waxbarashada iyo Wasaarada caafimaadka mudnaan gaar ah la siiyaa.

Waxa jira 2% oo Gobolada barri la siiyo. Xildhibaanka ayaa shalay ka hadlay waxaanu sheegay xildhibaanku in 2% loo sameeyey agaasime gaar ah oo qaybna laga dhigayo mashaariic horumarinta qaybna laga dhigo Siyaasada iyo maamul daadejinta, waxaanan is leeyahay waxa loo maamulay sidii ugu haboonayd.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal** **(18 min 30 sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, iyo Golaha sharafta lehba waan salaamayaa. Bacda salaan iyo mahadnaqada Ilaahay ka dib. Waxaan u mahadnaqayaa sida wanaagsan oo doodan oo loo baahnaa ee ku saabsan xaalada dalka waa wax wanaagsan in Xildhibaandu ka hadlaa goor kasta.

Haddii aan Golaha la wadaago xaalada dalka, waxaan u arkaa in waxna yihiin arrimo guud oo dalka khuseeya oo lagu qiimaynaayo dhinac kasta ama dhinac ka mid ah dhinacyada nolosha, waxna waxa weeyaan arrimahaas joogtada ah ee dal kastaa iska leeyahay. Anigu haddii aan guud ahaan eego dalka Somaliland iyo Somalida kale ee hareeraheena deganba.

Waxaan u arkaa inay Barwaaqo iyo Bash basha ku jiraan Alxamdulilah, taasna ilaahay ayaa siiyey. Waxa kow ka ah Roobabka ilaahay inoo siiyey ee biyuhu duhur durayaan, ee Caano jiraa, ee subagii Jiro waxaan ku qiimaynayaa in ay taasi nabad tahay.

Sidii Ilaahay ku yidhi Nabi Nuux (Calayhi Salaam) markaad ilaahay caabudaan ee aad u noqotaan, waxaan idiin da'siinayaa roobka, Togaga, Beeraha, carruurta iyo Xoolaha way idin badanayaan. Taasi waa ilaahay mahadii.

Haddii aan qayb qayb u kala qaado, xaga nabada waxaan u arkaa in dalku guud ahaan iyo Geeskeenan Africa ee Soomaalidu inta Badan degtaana ay nabad yihiin. Haddii aan qodobeeyo oo aan ka hadlo dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada.

Dhaqaalaha inagu inta badan waxaynu ku qiyaasnaa lacagta cashuuraha ee dadka laga qaado, waana nidaamkii aynu ka dhaxalnay Guumaystaha wax Revenue oo dawladaha hoose qaadaan, dabeedna dhaqaaluhu taas ku qiyaasan yahay. Si balaadhan haddii aynu u fikirno Guddoomiye iyo Mudanayaal. Dhaqaaluhu waxa weeye waxa waddanku Nutural resources haysto ama khayraadka dabiiciga ah.

Haddii aynu ka soo qaadno Xoolaha nool in kasta oo aynu dayacnay dhulkiina oo laga xaalufiyey, hadana intii Barwaaqadu dhacday Xooluhu way soo ifayaan oo imika reerkii 10 neef haystayba way lulanayaan. Dhinac kale marka laga eego waxa bilaabmay wax rajo weyn ina galinaya xaga dhaqaalaha oo ah in ay meelo badan ka bilaabantay Beerihii oo la horumarinaayo iyo Xoolihi oo la fadhiisinaayo oo caanihii iyo dhaqaalihi gaar ahaan

geella oo ka bilaabantay Somaliland iyo gayiga Somalidu degto. Taasi waa rajo dhaqaale oo bilaabantay.

Waxa kale oo aan u arkayaa rajo dhaqaale oo bilaabantay oo dhulka in aynu ku dul socono, la inagu aaso iyo dhagaxa oo marka aynu dhumano inala dulsaaro ama Guryaha lagu dhisto mooyee. Waxa nasiib wanaagsan in dadka Buuraha Golis ilaa Jabuuti laga soo bilaabo ilaa halka ugu dambaysa Somaliland halka ugu dambaysa ee raas casayr la yidhaado, in dadkii dhammaantood dhagaxii lagu jeestay wax laga helay.

Halkaas waxa ka bilaabantay khayraadka dhagxaanta ee dhulka ku duugan ama dahab ha noqoto ama dhamayn ha noqoto ama jaydh ha noqoto ama waxyaabo kale oo fara badan ha noqotee. Taasina waa wax badan oo bilaabmay oo haddii dad badani masaariifta ka helaan loona jeestay.

Xaga kalluumaysiga haddii aan u soo noqdo, kalluumaysigu waa halka ugu liidata ilaa hadda, waayo xeebaheena ayaa cidlo ah oo dadkii ka guureen oo bulsho kalluumaysato ah kolka hore umaynaan dhalan.

Hase yeeshee, waxa jira meelaha qaar oo wax ka belaabmeen oo laga kalluumaysto. Inkasta oo kalluunkii qaaliga ahaa la inaga dhamaystay, laakiin marka aad raas casayr xagaa uga gudubto waa baab kale, xagan kale marka loo soo noqdan xaga, dhagaxii kalluunka waxa jooga deeraga oo kalluunka cad-cad oo ah kalluunka degan oo ka mid tahay gaxashka iyo waxyaabaha yar dhagaxa hoosteeda gala la jajabiyey halkaasna dhaqaalihi ay dhibaato ka soo gaadhay.

Biyuhu waa khayraadka dabiiciga ah, waxa runtii ah in xaga bulshada iyo xaga hogaaminta dawladnimaba oo aynu inagu jirno iyo xaga maalqabeenka oo imika dadka Somaalida ugu tunka roon, in aanay wali I soo jeedsan inay biyaha qabtaan oo ay ka faa'iidaan.

Waxa ina dhaawacay laba kalmadood oo midi ay tahay maalgelin dibadeed ayaanu doonaynaa, eraygaas isaga ah xaga dambe ayaan ku darri doonaa waana waxyaabaha ina cawaray. Maalgelinta Gudaha iyo dalka oo la dhiso iyo biyaha oo aynu qabsano weeyaan waxa dhaqaalaha dhisayaa maalgelinta rasmiga ahina waa taas.

Ta kale ee ina cawartay bini-aadamku waxa uu ka nool yahay oo ka caafimaad qabaa jidhka iyo Mooralka, waa ta diintu inoo qorayso jidhka waxa ku jira waslad, haddii ay caafimaad qabto jidhka oo dhami wuu caafimaad qabayaa, haddiise ay caafimaad qabin jidhkuna ma caafimaad qabayo.

Waxa jira oo dhaawacan waa moralkii oo hogaaminta anigu xukumada odhan maayo,laakiin Hogaaminta Qaranka ee Golayaal Qaran leh, ee Xisbiyo leh, ee Madax dhaqameed leh, ayaa dhaawacmay. Maxay ku dhaawacmeen, waddan la citaafsan yahay

ma nihin, inaga oo citiraaf haysanin dalkaagii waxaad ka dhigtay wax aan jirin, waana moral di loo dhaqaalihi iyaga ayuu ku tiirsan yahay.

Arrimaha bulshadada, Guddoomiye iyo Mudanayaal arrimaha Bulshada dadku intoodii way ka soo baxeen haddii ay noqoto Miyi iyo magaalaba oo ay dadku shaqaysanayaan. Subixii shimbiruhu way kacaan iyaga oo gaajoonaya, waxayna soo noqdaan iyaga oo dharagsan. Qof kastaa wuxuu ka cayaa subixii lafo ha jajabiyo, caano ha iibiyo haddaad eegto dadku subixii sidaas ayey u kacayaan.

Tacliinta gaarka ah ee madaras leh, ee malcaamad leh, ee masaajid leh intaas mar carruurtii ku jarmaadayso meel oo aanay guryaha fadh fadhiyin way dhisan tahay. Hase yeeshee, qabyo way jirtaa oo caalamka oo dhan ayaa qabyo ah. Waxay u baahan tahay inaynu horumar ku samayno oo marba la saxo. Maxaa ka mid ah waxa la saxayo oo tacliin wax lagu soo saaro. Waxaad arkaysaa arday badan oo wax bartay oo aan bariis ku cuni Karin, laakiin haddii aynu barri lahayn sida tumaalka, beeraha iyo wixii la mid dhaqaaleehu wuu horumari lahaa.

Waxaan leeyahay waa la tayeeyo tacliinta dawladda iyo dugsiyada dawladda, tan kale ee gaarka loo leeyahayna sideeda u socoto.

Caafimaadka. Cudurro xun xun oo waddanka ka jiraa ma jiraan, hase yeeshee jidh fayaw ayaa maskax fayawna keena, inta la leeyahay Malaysia iyo Turkey waa masuubo cusub. Gumaystayaashii ee barriga dhexe ayaa batay, Turkey arrintaas waa in aynu joojino oo ninkaasi waa ni waddankiisa hagaajistay Alle ha barakeeyo, laakiin inaga waa inoo disaster, waana Africa oo dhan waana in aynu iska erinaa, welibana xamarna laga eryo, eraygaas cidii ay dhitaas raali ha ka ahaato, laakiin dhag castii carabta iyo Turkey labaduba ha na dhaafaan oo aynu ku bedelo Africa, Canada, Yurub iyo Austrial. Sababtu waxa weeyee dhaqaalaheena waxa lagu qiyaasay wadamadaas inooga yimaada lacagan 2,000,000,000. Waxaan leeyahay waa in aynu la macaamilno oo kuwan xidhiidhka u jarno.

Lacag ayeynu haysanaa waa in aynu soo kiraysanaa oo lacag siinaa, dhakhtarka aynu u tagayno wuxuu imanayaa Hargeisa, Boorma, Berbera Burco, Caynaba iyo barriga oo dhan. Markaa waxa kuu hayaa waa lacagtan aad dibada la aadayso.

**Gebo-gebo**

1. Waxaan u soo jeedinayaa oo aan u soo jeedinayaa Xukumada, madax dhaqamadeedka, Goleyaasha waxaan leeyahay waa in dadka la wacyigeliyaa oo laga wacyigeliyaa Qabyaalada, lagu wacyigeliyo dhaqaalaha, laga wacyigelinayo tahriibka iyo dhibaatada, lagu wacyigelinayo shaqo iyo wax qabasho iyo in lagu wacyigeliyo in ay biyaha qabsadaa. Taas oo ku imanaysa saddex qaybood inaga

Golayaasheena in degaanadii la hadalnaa oo waxa media laga siidaynayo dadweynaha ka wacyigelinaa.
2. Waa in aynu booqashooyinka ku badinaa deegaamada.
3. Waa in aynu wada tashana oo inagu oo ah Golayaal, Madaxda, madax dhaqameedka, Culimada iyo waxgaradka waa in aynu wada tashnaa oo hoos u dhaadhicinaa,isla markaana nabadgelyada xoojinaa.
4. Waxaan soo jeedinayaa in joojiyo madaxdan qoorta isaga wada duuban ee iska laalaada.

Waxaan leeyahay waa inu aynu wixii qabyo ah ka wada shaqaynaa sidii aynu wanaajisan lahayn, waxaanan rajaynayaa in hawshaasi si wacan inoogu dhamaato.

**Md. Maxamed Cali Xirsi** **(15 min 30 sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulilah. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku xigeenka iyo dhammaan xildhibaanada waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu Calaykum Warax matulahi Wa Barakaatu.

Anigu wax badan odhan maayo Guddoomiye, laakiin sidii xildhibaanadii iga horeeyey sheegeen waa arrin muhiim ah in aynu xaalada dalka qiimayno sidii xildhibaanadii iga horeey, waana arrin aynu waligeenba ku samayn jirnay qiimayn. Mar kastana waxa aynu qiimayno waa inay wax ka soo baxaan.

Waxaan xildhibaanada ku raacsanahay inay ka hadlanaa qodobkan isaga ah, waxaan ku raacsanahay in xildhibaandu deegaanadooda u hadlaan, waxaan ku raacsanahay xildhibaanada wixii dhibaato ah ee dalka ka jira inay sheegaan, iyada oo ay tahay in aynu talo raacino oo aanay noqon in aynu wax dhaleecayno.

Waxa kale oo iyaduna mihiim ah in Xildhibaanu fahansan yahay waxan aynu ka hadlayno, sidoo kelna ogaado in xildhibaanku uu qayb ka yahay xalka waxan aynu ka hadlayno oo uu qiimeeyo, isla markaana u gudbiyo cida ay khusayso haddii ay wax jiraan, isaga oo aan u hadlayn waxna u dhaleecaynayn sida dadka suuqa jooga raaciyana wixii talooyin ah ee u arko inay lagama maarmaan tahay.

Xildhibaanadu ha ogaadaan in maduucan aynu ka hadlaynaa inaga ina khuseeyo, looma baahan in xildhibaanadu in si indho la'aan ah Xisbi ku difaacaan, isla markaana looma baahna in xildhibaanadu si indho la'aan ah dawladda ku u difaacaan. Waa in aynu xalka keenaa kaas oo anfacaaya Dawlada, Xisbiyada iyo daweynaha, kaasi waa qodob.

Xildhibaanada lama qabo sida la sheegayo in balaayo jirto, waxaana ku raacsanahay xildhibaankii iga horeeyey in aanay ahayn sidaynu u dhigayno. Maaha mudanayaal in aynu buun buunino waxaan jirin, inaga oo masuuliyiintii ah. Qarankani dhibaato kasta oo timaada isagaa xalin jiray, kuwa la xalin jirayna inaga ayuunbaynu ahayn ama fulinta ha joogeen ama Barlamaanka ha joogeen. Mushkilada la hadal hayo ee Qaranka

dhexyaalaha ee had iyo jeer la hadal hayo wax ka mid ah arrinta Ceel-afweyn ama jabhada Gobolka Sanaag lagu sheego.

Dhibaatada labaad ee had iyo jeer la hadal hayaa waa doorashooyinka iyo koomiishan oo marxaladaha taagan ka mid ah. Waxa kale oo dhibaato taagnaan jirtay ah waa Abaarihii Ilaahayna waakii inaga dulqaaday Alxamdulilah dhulkuna sanadkan waa barwaaqo.

Mushkiladaha iyadana la hadal hayo waxa ka mid ah Goleyaasha Qaranka, inaga lafteenu ka mid ayeynu nahay arrinta Ceel-afweyne ka dhacday, Golahana waa Golaha ugu hadal hayska badan ama xaq ha la inuugu lahaado ama ayaan xaq la inoogu lahaane. Midna xaq la inooguma laha, markaad shacabka la sheekaysato waxay odhonayaan 12 sanno ayaad fadhideen. Waxaan leeyahay Golahani Gole xoog ku fadhiya maaha, Golahani Gole wax xidhaya maaha, Golahani Gole isagu wax jiidaya maaha. Markasta oo dawladda wakhtigaa jirtaa ee fulinta ahi ay go’aan gaadho ah in doorasho dhacdo. Waxaan qabaa in Golahi aanu lahayn awood uu isku hortaago, horta shacabku taas ha ogaado.

Shacabka waxaan u sheegayaa inta la helayo Gole la soo doortay oo badala Golahan ama inta dawladda markaa xilka haysaa diyaarinayso doorasho Golahani wuu sii fadhiyayaa, waana had iyo jeer mushkilada taagan ee la hadal hayo. Waxaan u sheegayaa dadka in Golahani aanu ahayn Golaha sidaas u fadhiya.

Marka miisaaniyada laga hadlaayo waa wax aynu inagu samayn karno, waa wax inaga ina horyaala. Waxa la inooga baahan yahay ta barri imanaysa haddii aad Gobol u hadlayso ama degmo u hadlayso iyo haddii aad qaran u hadlayso, waa waajibaad ina saaran ee aynu Miisaaniyadda gelino wax Qaranka u dan ah, in aynu gelino wax umadda u dan ah, oo aad u doodo marka Wasiirku ina horyimaado Gobolka aad ka soo jeedo oo aanad gacan iska taagin. Waxaan soo jeedinayaa in Golboladaas barri aad loo eego oo miisaaniyadda loo galiyo mashaariic oo inaguna oo aynu markhaati ka noqo, oo aynaan inaguna marka Wasiirku ina horimaado aynaan odhan duuduub ha lagu ansixiyo ee aynu Wasiirka halkaas soo fadhiisino oo waydiino wixii Miisaaniyaddi hore ka dhacay.

Mushkiladahaas oo dhan ta ugu weyn waa ta Golayaasha. Maxaynu Ceel-afweyn ka qabanay, maxaynu doorashooyinka ka qabanay, maxaynu xeerarka ka qabanay, maxaynu jabhada la sheegayo ka qabanay, ileen Golihii Waddanka u sareeyey aynu nahaye, maxaynu maanta odhan karnaa waxaas ayaanu qabanay tacab gelin. Waxaan qabaa in aanay jirin wax allaale waxaynu ka qabanay oo aynu ka mid noqonay dadka shacabka ah ee hadal haya siday u hadal hayaan oo cid ku riixaya ama dawladda ha lagu riixo ama Wasaarad ha lagu riixo ama Madaxtooyo ha lagu riixo, laakiin inaga oo ka gooni ah Maxkadaha iyo fulinta in inaga la inooga baahnaa in aynu wax qabadkeena aynu muujino oo maamulkeena muujino oo dib u heshiisiinta muujino oo had iyo jeer ka

qayb qaadano. Waxaan u malaynayaa Goluhu dhaliishaas ayuu leeyahay, Goluhu awoodiisii ha la soo noqdo. Dawladdu way matashaa, laakiin kanaa uga xoog badan, waxaan leeyahay waynu ka gaabinay xilkeenii, waxa kale oo aynu ka gaabinay oo Iyana meesha taala waa doorashooyinka.

Doorashooyinka qayb ayeynu ka nahay waynu dhagaysanaa. Waxaynu dhagaysanaa saddex Xisbi oo aynu inagu ka awood weynahay, oo inagu aynu xukuno, oo inagu aynu Baarlamaan u nahay, inagu sharciga gacanta ku ahayno. Waxaynu leenahay xagay iyagu go'aanka ku soo gaadheen oo iyagu ku soo heshiiyeen, waa masiibooyinka waaweyn ee cidna aanay ka jawaabi Karin.

Mudane Guddoomiye xeerka ina horyaalaa waa xeerka doorashooyinka muddo farabadan wuu ina horyaalay. Madaxweynuhu wuu soo gudbiyey, wuxuu u soo gudbiyey uu leeyahay sideeda ha lagu galo. Dawladdii xiligaa jirtay hal wakhti ayey ka dhigeen oo xal u arkay markaas. Madaxweynaha xiligan joogaana taas teedii ayuu soo codsaday. Xeerka ma xisbiga u cid ayaa maamulaya, ma Xisbiga kulmiye ayaa Maamulaya, ma Xisbiga Waddani ayaa maamulayaa, ma Madaxweyne ayaa maamulaya, mise inaga ayaa maamulayna. Waa su'aal meesha taala.

Caqli maaha, oo sharaf maaha in aynu ka dareeno qaar inaga inaga mid ahi halkii Qaranka oo dhami ina soo eegaayey oo uu leeyahay waa Golihii u dambeeyey, waa marjcii u dambeeyey ee xeer dejineed, Waa Qarankii u dambeeyey ee go'aan gaadheyey, waa Qarankii u dambeeyey ee dadka kala ilaalinayey, waa Qarankii u dambeeyey ee Madaxweynaha Qabanyey, waa Qarankii u dambeeyey Xisbiyada qabanaayey, in aynu is daba yaacno oo aynu nidhaahno xeerkaa ka qayb geli mayno. Maxay dadka shacabka ah eek u soo doortay ay filayaa. Anigu waxaan qabaa xeerka saami qaybsiga aynu ku tilmaamno ee tirade Gobolada ku tilmaamno ee doorashada hortaagan, ee Xisbiyadii isku mari waayeen, ee odoyaasha Madax dhaqameedyadu ka shirayaan, ee qabaa'ilku ka shiraayo, ee dadka suuqa joogaa ka shirayaan, ee aqoonyahanu isku sheegaya, ee sharci yaqaanada isku sheegaya waa shaqo inagu aynu leenahay ee aanay lahayn dadku.

Guddoomiye waxaan qabaa shaqadaa aynu soo celino xeerka ha ls oo dhigo oo dooda fa furanto, Boorama 12 ayey ku doodaysaa, Burco 15 ayey ku doodaysaa, Hargeisi 16 ayey ku doodaysaa. Golahaas wax aka soo baxa ayaa sharci ah. Haddii inagu aynu qaadan wayno, waxaan qabaa masiibo Qaranka oo dalka ku habsatay inay tahay.

Taasi waxay keentay inay shacabku inaga soo horjeedsaday, taasi waxay keentay in dhaliilo farabadan farabadan oo inagu aynaan lahayn dusha la inaga saaro oo la yidhaa. Waxaan ku soo gebo-gebaynayaa Guddoomiye:

In aynu arrimaha Qaranka ku soo kordha Guddi u saarno inaga madax bannaan, haddii ay Ceel-afweyn noqoto iyo haddii ay taa barriga ka shesheeya ay noqoto. Mar kasta qadiyadaha waddanka ku soo kordha ee mushkiladaha hortaagan ah aynu ka qayb

qaadano oo Guddoomiye waxaad awoodaada ku jirta in aad Guddi Qaran u saarto oo ka soo talo bixisa oo Golaha keenta, Golahaasi doodooda marka ay dhamaystaan Madaxweynaha hordhigta oo tidhaa talo-bixintadii wataas.

Waxaynu ka maqanahay haday ay Gobolo noqoto, haday nabadayn noqoto, haday noqoto inaynu talada dalka ka qayb qaadano. Waxaan qabaa taasi in aynu Golaha ku soo celino, waxa aynu ku soo celin karnaan waa dhaqaale. Dhaqalaha in aynu had iyo jeer dawladda u daba fadhiisano oo Xildhibaan kasta oo baxay in Wasaarada Maaliyadda loo tagaa waa qalad oo waa xaaraan, oo waxaad is hoosgaysay nidaamkii aad ilaalinaysay. Waxaan qabaa in miisaaniyaddaas imika imanaysa in Golaha loogu darro wixii Goluhu ku shaqayn lahaa. Waxaan qabaa in Miisaaniyadda Guddiyada lagu darro, waxaan qabaa in Miisaaniyadda Xildhibaanada xanuusada lagu darro oo halkaas la dhigo.

Waxaan qabaa in mardambe xildhibaan meel aanu tagin oo aanu wax u doodanin oo aanu wax u doonan Wasiir aynu inagu ansixinay.

Waxaan soo jeedinayaa mudane Guddoomiye in xeerkaas loo saaro Guddida Qaran si xeerkan sida ugu dhakhsaha badan Golaha loogu keeni, isla markaan aynu Go'aan uga gaadhno.

Waxaan leeyahay Golahani waa gebo-gebo waxa laga yaabaa in Miisaaniyaddani noqoto miisaaniyaddii ugu dambaysay ee la inoo keeno. Waxaan loo baahan yahay in aynu Gobolada eegno oo mashaariicda eegno.

Habka miisaaniyaddu u dejisan tahay waa hab qaldan. Waxaad arkaysaa Miisaniyada Wasaarada oo mar kaliya lagu darro intaas oo milyan. Waxa laga yaab in isu dhawaansho Wasaarada iyo wasiirka Maaliyaddi inoo jirno. Miisaaniyada Wasaaradu waxay noqonaysa mid intaas oo jeer aan dib loo eegin.

Waxaan odhan lahaa waa Miisaaniyadaha Wasaaradaha aynu dib isugu eeg eegno. Waxaan ku soo gebo-gabaynayaa Guddoomiye Golahai waa gebo-gebo waa in aynu dejinaa Golahaas dambe wixii uu inaga dhaxli lahaa. Haddii ay noqoto sida loo shaqaynayo, haddii ay noqoto xeer hoosaadkiisa, haddii ay noqoto sida la isku dooranayo, haddii ay noqoto sida loo ilaalinayo xeerarka oo aynu isu dhigno rag odoyaal ah oo wax badan oo qurux badan waddanka uga tagaya.

Xeerka doorashooyinka iyo Guddidan inagu soo socota iyadan waxaan odhan lahaa waar xeerkaniu ahmin maaha, xeerka inoo yaala waa in aynu eegnaa oo akhrinaa oo indhaha isku qabano uu siduu yahay u eegno. Caqli maaha in Xisbi kasta oo mucaarid ahi intuu inankiisa keeno uu ka kale dhaliilo, caqli maaha in aynu is daawano oo aynu eegno. Waxaad arkaysaa nin kastaa wuxuu keensanayaa ni uu isagu leeyahay xeerka

laftirkiisa ayaa wax ka qaldan yihiin oo ninka xisbiga haystaa wuxuu keensanayaa nin Xisbigiisa raacsan.

Waxaan qabaa mudane Guddoomiye in aynu xeerakn dib u eegno oo eegnaa sidaynu wax u dooranayno. Koomiishankaas imika murankiisu taagan yahay aynu eegno yeynaan ceeb kala kulmine, waxaan ku soo gebogebaynayaa waynu Golaha saxno oo eedaha ugu weyn ee Qaranku waa Golaheena. Waa Golihii umadan u hadli lahaa. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise** **(21min 50sec):-** Shirgudoonka sharafta leh iyo mudanayaasha salamu calykum. Intaa ka bacdi Mudane gudoomiye dee dooda qiimaynta xaalada dalku waxay ku haboontahay oo xildhibaanadi iga horeeyay ku raacsanahay in wixi ka so baxa ay noqoto talooyin waafaqsan dastuurka qowlka **53** dabaqada afaraad in ay shegayso Golaha wakiiladu in xukuumada u gudbin karo talooyin marka dooda wixii kaso baxaya in aan halkaa lagu daadin tacabaa inaga galaya shaqaalaha tacaba ka galaya inagu waynu doodanayna wakhti baynu galinaynaa marka haddi hadhow layska dhaafo dee inaynu doodna ma haboona . Markaa waxaan leyahay so jeedinaya dooda markay dhamaato ha laysku guro talooyinka kaso baxa Goluhu ha u codeeyo isagoo qodabaysan oo dhaxal gala oo macquula deedna xukuumada haloo gudbiyo.

Intaa ka bacdi Mudane Gudoomiye xaalada wadanka marka la eego guud ahaan wuu fiican yahay wax dhiba oo maanta Somaliland halis ku ah oo la odhanyo halis buu ku yahay ma jirto khilaadfadka matalan ka dhaacaya sida bariga oo kale iyo galbeedkan waa waxaynu xalinkarno runtii waana wax reer Somaliland uyaala markaa inaga xadkeena dhaafay maaha waa waxynu xalin karno iyagana hadi loo howlgalo way fududaanayan waa sidaynu inagu u xalino unbay ku xidhan tahay ee guud Somaliland maanta Alhamadulilaah waa sida Xildhabaan warsame sheegay waa roobanahay roob badan wuu jiraa laakin ceebtu waxa weeye bari biyo intay ina dhaafan ayaynu cabaadaynaa oo odhanaynaa biyo la'aan ba jirta taasina waa talo xumo oo waxa weeyan hadaynu biyaha qabsan karno oo aynu nidaamsan karno maynaan haraadneen laakin waa talo xumo jirta runti loo baahan yahay in qaran ahaan laga howl galo sidii khayraadka dabiiciga ah ee Ilaahay ina siiyay ee roobku ugu horeeyo in laga faa'idaysto Wadamo inaga roob yar oo sannadka oo dhan roobka ku da'a waxa ka badan roobka hargeisa maalin kaliya ku da'a wadamo dhan ba jira caynkas ah hadana dhibic roob ah oo dhulka uga dhacda ma jirto mid aan laga fa'idaysani ma jrto marka waxa weeye talo ubaahan tahay nimcooyinka ilaahay ina siiyay in laga fa'idaysto Qaran ahaan is laysku tashada oo xoog ina mideeyo oo laga fa 'idaysto weeye .

Xaalada dhaqaalaha runtide dhaqaaluhu guud ahaan wadamada so koraya walina Somaliland wadan la ictiraaf san yahayna maaha dhaqaaluhu wuxu ku xidhan yahay

wixii aynu marka aynu gacanta ku hayno oo waxad dhoofiso dhoofkeenuna inta badan waa xoolo, xoolaheeni way taagan yihiiin wayna xaniban yihiin.

Somaliland waxa looga baahan xoolaha maxa xanibaya Suucudiga ayaan u dhoofin jirnay Sucuudigina waxad mooda in uu nidaamkii hore inuu badalay mid unbu ubaahan yahay oo xajka ah waa la furaya marka kale looma baahna lama furayo marka arinta so koraya dadku waxay moodayaan inay iska dhacday iskamay dhicin waa siyaasad sucuudigu qaatay ood moodo xoolaha Somalidu gaar ahaan kuwa Somaliland ka dhoofaya waxa weeyan waa xoolaha kaliya iyagoo farabadan oo maasa ah wakhtiga xajka oo kaliya la heli karayo sidaasay markaa sucuudigu uga faa'ideeyen, marka kale waxaad mooda inay iska xanibaan.

Markaa somaliland waxay ubaahan tahay ina ay arrinta ka howl gasho oo waxa weeyan in darasad lagu sameeyo xoolaha ma Sucuudiga sidan qaatay mise cilado kalaa jira in Somaliland ay a howlgasho Wasaradaheega iyo xukuumaduba si dhoofinta xooluhu ay usii socdaan oo lacagtii inaga so gali jirtay aanay u yaraan

Waxa kaloo iyaduna haboon runtii oo iyaduna loo baahan yahay horta guud ahaan waxaad modaa xukuumadu sarifka dollarka in uu aad loo fadhisiiyay oo taa laga howlgalay waxaad modaa sarifku guud ahaan inuu meel taagan yahay tacabna way galiyeen oo Xukuumadu iyo Bankuba way ku mahadsan yihiin intaa waa dadaal la sameeyay oo halkaa lagu hayo in hoos lo dhiga mooye waa in aan kor ukicin taasina waxay ubaahan tahay dadaal farabadan oo xukuumadu ka warhayan iyo golayashaba Arrimaha bulshada markaynu eegno waxaan ku dari lahaa matalan hada roob badan baa da'aya oo waxa weeyan beeralay waynu leenahay runtii tacab badan wuu jiraa laakin waxaad modaa waxa dhaca in badiyaa matalan marka roobku da'o hadii wax la beero wax so go'aan ma nidaamsana inta badan waxa weeyan waxa gala matalan waxa suuqu ubaahan yahay iyo wixii kale markaa marar qaarkood waxa dhaca inagoo tacabnay in khasaare badan yimaado oo khudaarta dabada ka timaada oo kale hada waxa arkaysa Sinjibiil,Toon ama Basal laga keenay Yemen,China iyo meelahaas oo kale waxyaabaha bayac mushtarigeena gudaha ama beeralydeena inta badan ay uga cowdaan waxa weeye matalan waxa laysku fasaxasaya laysku sii daynayaa bayac mushtariga dibada iyo kii gudaha.

Markaa waxan soo jeedin lahaa in Golahani ka howl galo Xukuumada lala eego oo beeralayda gudaha in la dhiiri galiyo oo la kala sameeyo laba suuq' suuqa gudaha ah iyo ka dibada ah oo laysku misaamo si aanay beeralaydeenu aanay u khasaarin ama aanay uga gabanin ama aanay uga caajisin hadhow suuqoduna hoos udhicin marka waa darasado loo bahanyahay in goluhu inu sifeeyo oo xukuumada la kaashado sidii loo xoojin lahaa oo wax soosarka gudaha uu noqdo mid macquula oo dadku ay ka faa'idayan oo anu noqon mid khasaare keeni kara oo dadku ku khasaarayan marka loo eego waxa

debada ka imanaya taana waa in runtii xooga la saaro weeyan oo dhakhligeena gudaha si u ukaco hadii beeraha la ilaaliyo oo siidhkii la daryeelo.

Khudaarta siidhkii wuxu noqday wax la yidhaah **GMS** kan halmar baxa markaa waxaynu ubaahanahay runtii markaad eegto dadkan beeraha ka shaqeeya markad meelaha kula waraysato waxay ka cabanayaan waynu wala maqalnaa. Siihdkan halmar baxaya siidhkasina waxa uu noqdaa ka la isku maamulo caalamka layskuna tiriyo sidii loo samayn lahaa wax la yidhaah **Seed gate** banka siidhka oo la doono khudaarta oo dhan dib lo abuuro loo habeeyo hada Ethiopia way samaysatay waxay ledahay meelo oo lo diyaariyay lagu kaydiyo laguna tijaabiyo marka oo dub loo habeeyo loo celiyo si markaa siidhkii aanu u noqon mid dabar go'ay. Tana waxaan ku dari lahaa in howsha la galo qarankana lagala taliyo si siidhka loo ilaalin lahaa ama loogu howl gali lahaa in siidh cusub la helo oo aynaan noqon dad siidh dibada loga keeno ku tiirsan oo maalinta la waayo waad yaabaysa oo cidlaynu noqonayna .Ama **Food security** wax la yidhaah ayaa hoos udhacaya Somaliland.

Arrimaha bulshada waaxan runtii arintii uu shalay Xildhibaan siciid ka hadalayay ee Shaqaalaysiinta dhalinyarada kaso baxaysa jaamacadaha wanku raacsanahay waa arin halisa weeye oy taagan tahay waa arin aan hadii laga howlgalin oon maskaxda lagu hayn waxa weeyan waa siduu xildhibanku shagayay waa arrin dhici karta weeye. Arayda badan ee so baxaysa hamigoodu waxa weeyan inay shaqo helaan haday shaqo waayan dee barito waxa dhici karta inay so jeestanba marka waa howl ubaahan darasad dhaba in laga sameeyo Somaliland haday iskugu tagto golayasheeda iyo Xukuumadeeda wa laga howlgala waa in la jiheeya dhalinyarada so baxaysa. Dhalinyarada so baxaysa oo shaqo doonka iyo awooda Dawladu way kala badnaanaysa waa in marka laga fikira meelihii lakala gayn lahaa haday beero noqoto haday xoolo noqoto iyo hadii ay kalluun noqoto ama shaqo abuur kale noqoto waxayna ku imanaysa dee in caqliga laga shaqaysiiyo darasad lagu sameyo dhaba.

Madaxweynuhu hal abuurbuu keenay shaqo waxay ahayd shaqo qaran wax kaliyana maahe way is daba soconayaan kii horoo taagan markuu mid kale yimaado hadana mid kale yimaado way istaagaysa, marka waxay u baahan tahay caqli weeye Golayaashuna haka shaqeeyan Golaha Wakiiladu iyo wasaaradaheegu haka wada shaqeeyan waxay ubaahan tahay halka in aad loo daraasadeeyo. Waxaynu ubaahanay in la sameeyo iskuuladi farsamada gacanta si dadku ay hadhow ukala gali karaan dadku farsamo yaqaanin ukala noqon karaan.

Wadamada aduunyada horumaray sida Germans iyo Talyaniga farsamo gacmeed bay ku horumareen waxa la donayaa in iskuuladii farsamada gacanta la sameeyo gobaladoo dhan laga sameeyo walina haday ugu dhowdahay Burco iyo Hargeisa laga sameeyo hadii kale gobol kasta la gaadhsiyo runtii iskuulada samayntoodu lacag badan maaha laakin qalabayntoda qaaliya shaqaalahoda macalimiintooda waxayna ubaahanay in

macalimiinti hore Dugsiyada farsamada  gacanta ka ah in la uruuriyo la habeeyo Dawlada lala kaa shado dibadaha lala kaashado macalimiin la diyaariyo deedna marka halkaa farsamooyin kaso baxaan oo dadku marka farsamooyinka kala gali karaan oo qofkii farsamada markuu barto ku shaqaysan karo waxyaabaha weeye shaqo abuurka samayn kara hadhow weeye inaga yaraynaya culayska farabadane ka imanaya ardayda so baxaysa ee shaqa doonka ah.

Waxa ka mida in shaqooyin la abuuro waa in la eegto kaliya maaha Dahabshiil iyo Telesom maaha waa in ay xukuumadu samayso daarasado oo companys abuuraan oo maalgalinta gudaha la dhiiri galiyo oo deedna dadku saa ku kala faafan  oo shaqadii lakala galgalo waa waxyaabaha laakin inay riyo inoo noqoto laakin riyo maaha waa wax la dhamayn karayo waa wax hadii caqliga la galiyo oo laga shaqaysiiyo oo aragti la keeno oo aynaan iska fadhiyin halkan waa waxyaabaha ina hortaagan weeye ee dhibaatooyinka eeni kara waadiga arkaya Lubnan Tansania iyo Iraq wadamadasi waxa ka dhacaya waa dhaqaale xumo iyo shaqo la'aan ayaa laga cabaadaya bari ka maalin way dhici karta marka shaqo la waayo dadku isi so taagan ilaahay wuxu inogu sakhiray walina nidaamkeenan ee isku tiirsanahay dadku isku tiirtiirsan yahay ee ilmihii hadu camal waayo guruga wax ka cunaya taasa ina kaabayse hadii nin walba suuqa lagu sii daynlahaa abri hora lakala yaaci lahaa marka waxa weeyan .

Mudane Gudoomiye talooyin keno Golahii Wakiiladaynu nahay talada qayb baynu ku leenahay dadka inaga ka wakiila waxay u baahan tahay wixi talo aha in la uruuriyo marka wixi talo ah auynu Xukuumada ugudbino.

Waxbarashada iyada ku dheeran maayo muran maalin dhawayd waxayn ubaahnayn un xukuumadu eeg Golaha guurtidu so saareen gudidii joogtana  ahaana aragti bay yeeshen waxa laysku raacay muranka maalinti dhawayd qaybna xukuumada ku qaldan qaybna barakiska ku qaldana waxa weeyan Somaliland ardayda wax barata ama privet haku jiro ama public ha ahaade waa arday reer Somaliland ah. Institutionka iskuulka hebel hebel ka hadli maayo ardaygu waa arday reer Somaliland ah wuxu xaq uleeyahay waxa ardayga kale xaq uleeyahay. Aragtida Xukuumadu ay qaadatay waxanu wax siinayna kuwa kaliya dowlada waa arin qaldan weeyan laakin ardayga iskan dhigta wuxu xaq uleeyahay waxa ardaygan kale helo.

Dowladuna inay tan qaadatabe ahaydoo ha ukala badiso 30% privet-ga u siinay 70% waxanu u siinay dowlada waxay ku dhawaanaysa cadaalada. Sidoo kale privet-iskuulisku waxa looga baahan yahay deeqa ay helaan in dowlada ugudbiyaan oo iyagana loo qaybiyo markaasay iyaguna xaq helayaan laakin iyaguna fuuqsadan tooda oo way qariyaan markaasay dowladana wax ka doonayaan taasina caadalad maaha iyaguna ku qaldan yihiin marka si cadaalada wixi la helo in loo qaybiyaa fiican. Xeer hoosadka iyo nidaamka inuu wafaqaan bay ahayd waa lawala cadeeyay waxayna so saaren inuu khilaafsan yahay xeerka waxbarashsada.

Aragtida waxa moda xukuumadu waxay qaadatay Privet iskuulisku waa business weyaan waa goobo ganacsi bay qaaten marka hadii ay taa qaten wa inay wasarada ganacsiga ku xidhaan oo yidhaahdan warshada ganacsiga so qaata taasina waa dood meel ganacsi maaha wasarada waxbarshadu wax so saar maaha waa wasarad dad soo saarta ma lacagbay soo saarta mise dad bay so saarta waa doodo yaala waana in laga doodo weyaan laakin caadiyan wasarada waxbarashadu wasarad wax so saar maaha waa wasarado dad so saara marka taana wa arin ubaahan in talooyin laga keeno oo aad looga fikiro xeerka iyo xeer hosaadka ay ka cabanayaan in lays waa fajiyo weeyan.

Caafimaadka inyar baan ka odhanya runtii waa iga soo jeedin un waxa weeyan nimanyahow waxad ogtihiin Somaliland caafimadka markay noqoto privet-ga iyo public-ga waxa xoog badan privet-ga caafimadku iyo adeegiisuba waxa uu inta badan ku jira waa gacanta dadweynaha markuu saa yahay moralkiibaa yaraanaya wuxu noqonaya wixii lacag ba laga samynaya dabadeedna waxa imanaysa inuu qofku eego faa'idada oo anu eegin nafta qofka bini aadamka u adeeg waxad arkaysa nin ku odhanay hadii aan la dhigin 1000$---2000$ ma qalayo dee ethicskii iyo moralkiiba meesha wuu ka baxaya waxana privet-ga wuu ka jira wayna tagna laakin waa la maamula laakin dowladeena waxad modaa inay daba socoto prvet-ga un bay daa soconayaan taasi waxay keenaysa in dayaca badan yimaado. Lacag badana waxay inaga baxdaa ninkastoo Xlidhibaan ah ama wasiirku xanuusado dibada un bay uyaacaynade marka waxay ku haboontahay in lacagta gudaha la galiyo oo aynaan debada geline gudaha galino waxaan odhan lahaa gudaha hala dhiiri galiyo Dowladuna ha maamusho wixii talo ah haku yeelato oo aan la daba soconin waxa aad inoogu badan nimanyow soo badanaya xanuunak la yidhaah **C**ancerka oo ah xanuun so badaya.

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal oo waxad arkaysa qof reer Somaliland ah oo Cancer ku dhacay dibada la geynayaa waxana la inagu soo celiyaa isagoo mayda ama isagoo sakaraada qadarka Ilaahay baa haya laakin talada qaybaynu ku leenahay waxan soo jeedin lahaa anigu qaran ahaan iyo gole ahaanba in la sameeyo dhakhaatir kuwa dhalada iyo ku ajinabi ah in darasadeeyo sidi lo daaweyn lahaa xanuunada Cancelka,Macaanka,Dhikarka iyo xanuuno nocaasa.Marka waxan so jeedin lahaa oo Xukuumada cidwalba u diraya in la sameeyo xanuuno Cancelka lagu darasadeeyo dad badana wan arkoo dhibaata badan ba jirta waxay noqoto ha noqoto marka darasad la keeno oo la baadho ee xanuun la sameeyo markaasynu ogaanaynaa taana runtii waan so jeedinaya waxa weeye cafimaadka waynu uwala baahanahay in aad xooga loo saaro weeyan dowladuna ay maamusho weeyan oo aanay kawada bixin ee wixi talo ah ku yeelato hadii ay dowladu awoodeeda isticmaali lahyd wax walpa way hagaagi lahayeen laakin waxad mooda inay ka gabanayso waa inay awood isku yeesha oo caafimadka qayb ku yeelata dhakhtarkan wayn agteena so eega bal walahi waydun yaabi madaxuna wuu ku xanuunaya.

**Md. Axmed Cabdi Nuur Kijaandhe** **(15min 45sec):-** Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Marti-sharafta iyo Saxaafada waxaan idinku salamaaya Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Xaalada Dalka,** inkasta oo shaqaaqooyin ka jiran Bariga lakiing hadana guud ahaan xaalada dalku guud ahaan maalinba maalinta ka danbeysa waa ay soo wanaagsanaaneysa.

Dhaqaalaha iyo hurmumarka dalkuna waa uu ka soo reynaya sidii hore oo wax weyn ku soo Kordhinaya:- Casriyenta Degeda Berbera oo ascaar badan oo Ethiopia ku socota ka soo degeyso, Furfuritaanka Dalka Ethiopia oo ay alaabta degeda Berbera ka soo degta ay gelyso ehtipia, Berigii hore lama ogoleyn in alaabada Somaliland ka timada ay gasho Ethiopia, Wadooyinka Cusub ee la sameynaya ee Borama-Djibouti iyo Hargeisa –Burco iyo Dub-cusboneysiinta Wadada Wajaale-Berbera, Waxa intii Xukuumadanii wax ka qabatey sixir-bbararkii sida xawliga u socodey ee Wasiirkii Maaliyada ee xukuumadii hore yidhi waxba laga qaban karo. Waan soo dhaweynaya arintan sababta oo ah sixir-bararku waa astaan ku xun Xukuumadaha, Maamulka Lacaga iyo Cashuur aha ururintoodii iyo sidii loo isticmaaleyna waxaan romeysnahey iney wax badan ka bedeshey oo ay leedahey priorities iyo Budget goan. Runtii muddo kooban ayey jirtey xukuumadu waxaan ka rajeynaya iney dhibaatooyin badan oo jira xaliso.

**Xaalada Bariga ka Jirta (Caare+El-afwein) iyo Shaqaaqooyin soo Noq-noqnaya oo Qaba'il. Gobolada Bariga,** Waxa ka jira Gobolada Bariga Shaqooyin Badan oo soo Noqnoqa oo nafo badan lagu waayo oo ay badantahey laba jilib oo dagaalama ama Cross boarder.
-Walaalayaalo sideedaba Gobolada bariga waxa ka jira dawladan la'aan amaba maamulka ka jira Goboladaas ayaa taagdaran oo aan lahey awood ay ku sugi lahayeen amaanka ama ay adeega asaasiga ah ku fidiyaan.

**Xalilo shaqaqooyinka maalinlaha ah Ceel-Afweine iyo Caare,** Waa muhim in xal degdeg ah waara loo helo dhibatooyinka iyo shaqaaqooyinka ka jira Ceel-afwein iyo Arinta Caare. Runtii intii muddo ah ayey soo socotey, In kaste oo Xukuumadu ku dadaashey iney halkaas ku heyso oo aaney sii fidin lakiin waa ay jiitantey. Waxaan ka jirin Maamul dawladeed.

**Caasimada Hargeisa iyo Dawladii Hoose,** Maamulkii dawlada hoose ee Caasimada Hargeisa waa laga deyrinaya oo dadweynaha reer Hargeisa waxey ka shakisanyahiin inu Burburey maamulkii dawlada hoose. Dawladaha Hoose meel muhim ah ayey kaga jiraan horumarka dalka iyo magalooyinka iyo iney fidiyaan adeegyada asaasiga ah. Kalintaasi waa ay ka maqantahey, Xoolaha Magaalada Jooga iyo Reer Guuraya oo subulaha ka soo guurey oo Hargeisa meesha ay donaanka degayaan.

Wadooyinkii oo lagu soo durkayo, Magaalada Hargeisa waxey u eegtahey dhul aan cidi laheyn. Dhibatooyinka Dalka ka jira waxaa weeye dhul la isku heysto waxa sabab u ah Maamul xumo ka jirta dawlada hoose ee Hargeisa. Maxeynu Bari wax ka qabana Hargeisa ayaa gurmad u baahan maamulkeeda iyo nidaaminteeda.

Xukuumada dhexe xil ayaa ka saaran dhibatooyinka ka jira dawalada hoose ee Hargeisa yaaney indhaha ka qarsan. Intii muddo ah waxa laga dhursugayey iney xukuumadu faro-geliso lakiin waxba lagama qaban. Lama sii eegan karo.

**Waxabarashada Asaasiga+Xeerkii Waxbarashada ee Dalka; Dugsiyada Dawlada:** Xeerka Waxbarashada Asaasiga ah ee Golahani loo soo gudbiyey ee xukuumada loo gudbiyey ee ay hirgelisey waxa u ahaa mid aan tayo laheyn aan anfacin dalkan. Waxa u baahan yahey dub loogu noqo oo la hagaajiyo.

Waxa sameyn ku yeeshey markii laga dhigey dugsiyada hoose dhexe lacag la'aanta. In kaste oo caruur badan dugsiyada galeen oo ay ka fa'ideysteen lakiin tayadii dugsiyada Dawlada hoos ayey u dhigtey. Gunadii ay Macalimiintu qaadan jirtey iyo kharashyadii nadaafada dugsiga, biyaha iyo dayac-tirka fasalada iyo dugsiga guud ahaan ayaa meesha ka baxadey. Dugsiyadii Dawlada waxey noqdeen meel aan cidi laheyn waa laga qaadey dhulkii, waxaad eegta iskuulkii Tariikhiga ahaa ee Sheikh Bashiir, Iskuulka Riis+Maxamuud Axmad Cali+

**Dugsiyada Private,** Wasaarada Waxabarshadu yaaney u arkin waxbarashada privt-ga Cadaw ee waaney meeleyso (Accommodate). Runtii Qaladaad badan ayaa ka jira Waxbarashada Privte ah oo ay ka mid tahey Caruurta Fasalka Fadhida qarkood waa siteetan, Manhajo kale ayaa lagu barta, Macalimiinta u dhigaya maaha qaar tababaran, Laga Baryi maayo iney Manhajka dalka dhigaan+AmA CASHUURTA ku waajibtey ay bixiyaan+ama Liisan La'aan ku shaqeyaan.

Waxa lakiin loo baahanyahey sida aynu ka dooneyno iyo sida aynu doneyno iney u ekadaan waa iney Xeerka waxbarashada ku jiraan ama ku yalaan. Lakiin Wasiirku kaas ku Kormeera lakii.

**Waxaan ku talinaya in si dhakhso ah wax laooga qabto waxbarashada Asaasiga ee Caruurta, Ma inna sugayaan caruurtasi waa Emergence.**

**Hogaan Dhaqameedka Somaliland** Xaalka Hogaan dhaqmeedka Somaliland meel xun ayey marayaan oo aan la eegan karrin oo aan ka baqanayo iney dalkan dumiyaan oo colaado qabaa'il kenaan. Arintoodu markii hore Somaliland iyo Somalia ayey ku koobneyd ee imika waxey marayaan iney shirar dalal kale ka socoda ka qeybgalaan iyo iney dawlada shisheeye heshiis la soo galaan oo qarkood adoon ka soo qadataan oo ay
Dalkan xukuumad ayaa loo doortey Madaxweynahu hogaaminayo iney mashaakilka dalka wax ka qabataan (Nabadgelyo iyo Horumar ba) Maaha iney barbar cararaan oo ay

u shaqeyaan sidii hayadaha dawlada. Meel khatar ah ayey qarkood marayaan waa lagu soo celiyo xeyndaabka dhaqanka ee jiri-jirey.

Hadaba, waxaan xukuumada+ arrimaha gudaha u soo jeedinaya in xeer u sameyaan La taxaluqa Hogaan Dhaqameedka Garaad, Suldaan, Boqor iyo qaar oo Badan. Aqoonsiga Dalka, Doorashada Wakiilada, Guurtida iyo Golaha Degaanka,

**Gunaanadka** Waxaan ku soo gabagabeyna sidan: Walaalayaalo dalkani innaga badan, waxeynu u baahanahey ineynu hagaajisano oo ninna la durkin. Waxaan ku talinaya Xukuumadu iney ka shaqeyso sidii ay kalsoonida dadka u soo jiidan laheyn. Waxaney ku soo jiidan karta iney cadaalad iyo sinaan sameyso oo ay u xaqsoorta dadkeeda oo ay dhex u noqoto.

Wax loo baahanyahey iney midnimada dadweynaha Somaliland kor u qaado oo ay kala qeybsanaata. Waa inaaney Xukuumadu qabyaalada aaney dhiirigelin. Waar yenaan qabyaalada isu dhiibin waa ay inna kala qeybineysa.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ________________________________ | ________________________________ |